MINISTRY OF COMMERCE & INDUSTRY
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**SOOMAALIYA IYO AAGGA GANACSIGA XORTA AH EE QAARADDA AFRIKA**

# Heshiiska Dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

**August 18 2020**

WAXA DIYAARISAY WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA JFS

## Hesshiiska Dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

## Hordhac

Annaga oo ah Dowladaha Xubnaha ka'ah ururka midowga Afrika,

Annagoo ka duuleyna fulinta go'aanki ka soobaxay Kalfadhigii 18 aad ee shir madaxeedka midowga Afrika ee Magaalada Adis-Ababa ee Dalka Ethiopia 29-30 Janaayo 2012 si loo sameeyo ra'yi uruurin, Qorshe-howleed iyo qaab-dhismeed u jeedadiisu tahay sidii loo dedeji lahaa dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Xoojinta Ganacsiga gudaha ah ee Qaaradda Dhexdeeda.

Annagoo tix-raaceyna go'aanaddii ka soobaxay shir-madaxeedki Madaxda Midowga Afrika ee Magaalada Johannesburge ee Dalka Koofur Afrika 14-15 juun 2015 kaas oo tirsigiisu ahaa 569 iyadoo latix raacayo miraha heshiiska Abuuja ee lagugaaray Magaalada Abuuja ee Dalka Nigeria ee ahaa Shirki 25 aad ee Madaxda Midowga Afrika kaas oo tilmaamaaye mabaa di'a ay kamid yihiin dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ujeedkiisune ay tahay is-dhexgalka Afrika.

Annagoo go'aan sananay in aan sare u qaadno Xariirka dhaqaale ee Afrika kuna dhisan Xuquuqaha iyo waa jibaadka ee heshiiska dastuuriga aha ee Midowga Afrika ee 2000, heshiiska dhaqangalay ee Abuuja iyo heshiiskii Marrakeesh ee lagu dhisay ururka Ganacsiga Dunida ee 1994

Annagoo tixgelineyna hiigsiga fog ee ajandaha 2063 ee ah suuqa Qaaradda Afrika oo xor ah isu socodka ganacsatada Afrika is-dhaafsiga badeecada, Adeegyada ujeedkuna uu yahay in muhiimadda lasiiyo is-dhexgal dhaqaale ee Afrika iyo in la dhiirigeliyo hormarka beeraha, sugnaanta cunnada, wershadeynta iyo habka is-dhaafsiga dhaqaalaha.

Annagoo ogsoon baahida loo-qabo in la'abuuro lana ballaariyo suuqa xorta ah ee ku saleysan is-dhaafsiga badeecadaha, adeegyada iyadoo loo marayo taageeridda dowladaha ee dhismaha kaabayaasha Dhaqaalaha yareynta iyo baabi'nta shaqo la'aanta.

Sidoo kale annagoo ogsoon baahiha loo qabo dhismo hey'ado sharci ee dhaqan geliya heshiisyada ku saleysan gancsiga iyo ilaalinta xaquuqda hanti maskaxeedka si loo xafido dhinaca seddexaad

Anagoo og, muhiimadda ay leeyahay nabadgelyada caalamiga ah, dimuqraadiyadda, Xuquuqda Aadanaha, sinnaanta Jinsiga iyo kudhaqanka Sharciga ujeedaduna ay tahay hormarinta ganacsiga dunida iyo iskaashiga dhaqaalaha

Waxaan aamin sannahay, xuquuqaha ay u leeyihiin dowladaha xubnaha ka'ah Ururka Midowga Afrika in ay ka mid dhigaan sharciga gudaha si heshiiskan uu u yeesho saameyn sharci dhinacyada caafimaadka, Badbaadada, deegaanka, anshaxa guud iyo ilaalinta kala duwaanashaha Dhaqanka

Si lamid ah waxaan qireynaa in ay jiri karaan xuquuqo iyo waajibaad heshiisyo kale ee aan dhinac kanahay

Caddeyn ururka isutagga dhaqaale Goboleedka ee Midowga Africa uu yahay aas-aaska udub dhaxaadka dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waxaan ku heshiinnay Qodobada Soo-socda:

## Qaybta I [aad]

## Qodobka.1 [aad]

## Qeexitaano

Ujeedada Erayada kujira heshiiska waxaa loo fasirayaa sida soo socota:

a) "**Heshiiska Abuuja**": waa heshiiska lagu dhisay ururka dhaqaalaha Afrika sanadki 1991
b) **"Heshiis":** waa heshiiskan lagu dhisayo Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Africa, habraacyada iyo lifaaqa ku lammaanan ee aas-aas u ah jiritaanka heshiiskan.
**c)** **"Lifaaq":** waxaa loola jeedaa dukuminti lagu lifaaqo heshiiska kaas oo qayb ka'ah heshiiska.

d) **“Tixraac”:** waxaa loola jeedaa dukuminti lagu xiro lifaaqa heshiiska kaas oo qayb ka’ah heshiiskan.
e) “**Shir-Madaxeed**”: waa shir-Madaxeedka Madaxda Midowga Afrika
f) “**Midowga Afrika”** waa Ururka Afrika ee ay ku bohoobeen Dowladaha Afrikaanka.
g) “**AfCFTA”:** waxaa loola jeedaa Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.
h) “**Guddi”:** waxaa loola jeedaa Guddiga Midowga Afrika.
i) “**Sharciga Dhismaha**”: waa shaciga dhismaha Midowga Afrika ee 2000.
j) “**Mideynta Furdooyinka Afrika”:** waxaa loola jeedaa mideynta canshuurta lasaaro badeecadaha taas oo lagu dhisay heshiiska Gudiga Dhaqaalaha ee Afrika 1991
k) **“Golaha Wasiirada”:** Waxaa loola jeedaa wasiirada Ganacsiga ee Dowladaha xubnaha ka’ah Midowga Afrika.
l) “**Guddiga Xallinta Khilaafaadka”:** waa guddiga Xalinta khilaafka kadhasha Heshiiskan iyo hab-raacyada inta aan ka’aheyn inta kucad heshiiskan.
m) “**Golaha Fulinta”:** waa wasiirada Midowga Afrika.
n) **“GATS”:** waxaa loola jeedaa Heshiiska Hey’adda Ganacsasiga Aduunka (WTO) ee kusaabsan Adeegyada sanadki 1994
o) “**GATT”:** waxaa loola jeedaa Heshiiska ganacsasiga iyo Tariifada go’an ee badeecadaha 1994 ee Hey’adda Ganacsasiga Aduunka (WTO).
p) “**Heshiis**”: haddii aan si’kale loogu sheegin heshiis waxaa loola jeedaa heshiiskan iyo dhammaan habraaca iyo lifaaqa saameynta ku leh heshiiskan.
q) “**Xubnaha Dowladaha**”: waxaa loola jeedaa Dowladaha Xubnaha ka’ah Midowga Afrika.
r) “**Caqabada aan Tariifa aheyn”:** waxaa loola jeedaa in laga hortago caqabadaha lidka ku ah gananasiga iyadoo lasaarayo canshuur aan ahayn tan waajibka ah.
s) “**Barotokool”:** waxaa loola jeedaa lifaaqa ku lammaanan heshiiskan oo leh awood sharciyeed.
t) **“RECs”:** waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Dhaqaale ee uu aqoonsaday Midowga Afrika:

Midowga carabta Maghreb “(UMA)”

“**COMESA**”: Suuqa ay ku Mideysanyihiin Dalalka Bariga iyo Koofurta Afrika

“**CEN-SAD”:** waa Urur Goboleedka Dhaqaale ee dowladaha dhaca Saaxil iyo Saxaraha Afrika.

**“EAC”:** waa Urur Goboleedka Dhaqaalaha dowladaha dhaca Bariga Afrika.

**“ECCAS”:** waa Urur Goboleedka Dhaqaalaha dowladaha dhaca Bartamaha Afrika.

**“ECOWAS**”: waa Urur Goboleedka Dhaqaalaha dowladaha dhaca Galbeedka Afrika.

**“IGAD”:** waa Urur Goboleedka houmarinta Dhaqaalahaha dowladaha dhaca Bariga Afrika.

**“SADC”:** waa Urur Goboleedka horumarinta Dhaqaalaha dowladaha dhaca Koofurta Afrika.

u) “**Xog-heyn”** waxaa loola jeedaa Xog-heynta lagu xusay Qod.13 aad ee heshiiskan.

v) “**Dowladaha Xubnaha**”: waxaa loola jeedaa Dowlahada saxiixay heshiiskan oo uu waajib sharci kunoqonaayo fulintiisa.

w) “**Dhinaca Seddexaad”:** haddii aan si’kale u qeexin heshiiskan, dhinaca Seddexaad waxaa loola jeedaa dowlad aan saxiixin heshiiskan.

x) “**WTO”:** waxaa loola jeedaa Ururka Ganacsiga Adduunka ee lagu dhisay heshiiski Marrakesh1994.

## Qaybta II

## Aas-aaska dhismaha, ujeedooyinka, Mabaadi’da iyo Xadka ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

### Qod.2 aad

### Aas-aaska dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Aas-aaska dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxaa loo tixraacayaa sida kucad qodobada soosocda

## Qod.3 aad

## Ujeedooyin Guud

U jeedooyinka guud ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxaa ay kala yihiin:

a) In la dhiso suuq mid ah ee badeecooyinka, adeegyada una fududeeya is-dhexgal dhaqaale ee Qaaradda Afrika lana tixraacayo mabda'a Afrikaannimada si'loo gaaro nabadgelyo iyo barwaaqo hiigsiga fog ee 2063.
b) In la dhiso suuq Xor ah ee badeecooyinka iyo adeegyada iyadoo lagawada xaajoonayo.
c) Gacan siinta dowladaha saxiixay heshiiskan iyadoo lagu gacansiinayo dhaq-dhaqaaqyada Ganacsiga, Maalgelinta,hal-abuurka isu socodka dadka.
d) In marxadda xigta la dhiso Hey'ad mideeysa dhaqamada dadka Afrikaanka ah.
e) Abuuridda iyo sare u qaadidda jawi degenaasho bulso iyo horumar dhaqaale, Sinnaan iyo is-bedel dhab ah ee Dowladaha Xubnaha ka'ah heshiiskan.
f) Dhiiri gelinta Tartanka dowladaha Saxaiixay heshiiskan ee Qaaradda dhexdeeda iyo suuqyada caalamka.
g) Sare u qaadidda horumarinta warshada, beeraha iyo ilaalinta dalagga.
h) Xallinta caqabadaha soo wajaha dowlahada xubnaha ka'ah heshiiskan iyo daadejinta hannaanka is-dhexgalka ee xag Gobal iyo tu Qaaradba.

## Qod.4 aad

## U jeedooyin Gaar ah

Si'loo gaaro loona fuliyo u jeedooyinya lagu xusay Qod.3 aad ee heshiiskan Dowladaha xubnaha ka'ah waa in:

a) Ay baabi'so Tariifooyinka iyo Caqabadaha aan Tariifada aheyn ee lidka ku ah ganacsiga badeecadaha.
b) In ay Dowladda siiso Xorriyad Ganacsiga laxariira Adeegga.
c) In ay Dowladda gacan kageysato Maal-gelinta, ilaalinta Xuquuqda lahaanshaha gaarka ah iyo siyaasadda tartanka.

d) In ay Dowladda gacan kageysato dhammaan waxkasta ee laxariira ganacsiga.
e) Iskaashiga xagga furdooyinka isla markaana ay fuliso tilaabooyinka Fududeynta Ganacsiga.
f) In dhiso hab lagu xalliyo Murannada iyadoo la dhowrayo Xuquuqaha iyo waa jibaadka dhinacyada u dhexeeya Muranka.
g) In la dhiso hab lagu dhaqan gelikaro heshiiskan.

## Qod.5 aad

## Mabaadi'da Heshiiskan

Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waxa hagaya Mabaadi'da soosocda:

a) Heshiiskan waxaa maamulaya madaxda Midowga Afrika.
b) Suuqyada xorta ah ee Urur Goboleedyada dhaqaale ee Afrika ayaa tusaale fiican u ah dhismaha heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika
c) Kala duwidda Xarumaha
d) Dabacsanaan iyo xallinta kala duwanaashiyaha
e) Daah-furnaan iyo isu gudbinta xogaha
f) Ilaalinta hab-dhaqanka wanaagsan
g) Mudnaan isku wada mid ah
h) Isku si ula dhaqmidda badeecadaha gudaha iyo Dibadda
i) Is-qadarin.
j) Ilaalinta Xorriyadda
k) Go'aan qaadasho wada ogol ah
l) Dhowrista ilaalinta ugu fiican ee Urur Goboleedka dhaqaalaha Afrika, Dowladaha saxiixay heshiiskan iyo heshiisyada caalamiga ah ee saameyn sharci ku leh Midowga Africa.

## Qod.6 aad

## Xadka Sharcigan

Heshiiskan waxa uu ku saabsanyahay Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada, maal-gashiga, Xuquuqda hanti maskaxeedka iyo siyaasada jaangoynta tartanka ganacsi

## Qod.7aad

## Wejiga II aad Wadaxaajoodyada

1. Ayadoo laga amba qaadayo u jeedooyinka guud ee heshiiskan madaxda Dowladaha Xubnaha ka'ah midowga Afrika waxa ay Wejiga 2 aad kagelayaan wada xaajood arrima soosocda:
   a) Xuquuqda Hanti maskaxeedka
   b) Maalgashiga iyo
   c) Siyaasadda tartanka
2. Wadaxaajoodyada lagu xusay faqradda 1 aad ee Qodobkan waxa lasameynaya Marka lagu ansixiyo heshiiskan shir-madaxeedka Midowga Afrika.

## Qod.8aad

## Xaaladaha laxariirta heshiiskan ee lifaaqyada

1. Lifaaqa laxiriira ganacsiga badeecadaha, Adeegyada, maal-gashiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, siyaasadda tartanka, xeerarka iyo habraacyada xalinta khilaafaadka waxa ay u baahanyihiin ansixin si'ay qeyb uga noqdaan heshiiska.
2. Lifaaqa dib kayimaadda ee laxiriira ganacsiga, maal-gashiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, siyaasadda tartanka, xeerarka iyo habraacyada waxa ay qayb kanoqonayaan heshiiskan.
3. Dokuminti kasta ee daruuri ah Lana xiriira u jeedooyinka inta uu xadeeynayo heshiiskan lana saxiixay waxa uu qeyb kanoqonayaa heshiiskan.

## Qaybta III

## Qaab-dhismeedka Maamulka

## Qodobka.9aad

### Hab-dhiska hey'adda fulinta ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waa hey'ad fulineed shaqadeedu tahay Maamulka iyo kor-joogteynta ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika Qaab-dhismeekeedu yahay sida soo socota:

a) Golaha Guud
b) Golaha wasiirada
c) Guddiga khubarada sare ee Ganacsiga iyo
d) Xog-heyn

## Qod.10aad

## Golaha Guud

1. Golaha Guud waa hey'adda ugu sareysa ee leh go'aan qaadashada oo hoostagta Midowga Afrika shaqadeedu tahay dejinta istaraatiijiyadda, dejinta qorshe howleedka si'loo helo isdhaxgal dhaqaale iyo korjoogteynta.
2. Golaha waxa ay leedahay awoodda fasiraadda heshiiskan ayadoo talo kasiineysa Golaha wasiirada. Go'aanka ansixinta fasiraadda waa in uu noqdaa wada ogol.

## Qod.11aad

## Hawlaha Golaha Wasiirada

1. Golaha wasiirada ee lagu dhisay sharcigan waxa uu ka koobanyahay Wasiirada Gancsiga ama wasiiro kale ama hey'ad, ama Masuulkii ay u igmadaan Dowladaha Xubnaha ka'ah heshiiskan.
2. Golaha Wasiirada waxa ay war bixinnada siinayayan Jamciyadda ayagoo u siimarinaya Golaha fulinta.
3. Golaha wasiirada waxaa kale oo awood u leeyihiin
   a) Go'aan qaadasho aan ka baxsaneyn xuduuda sharcigan
   b) Hubinta fulinta iyo dhaqangelinta heshiiskan
   c) In ay qaadaan tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu xaqiijikaro u jeedooyinka heshiiskan iyo aaladaha kale ee xiriirka leh
   d) Wada shaqeyn laleh hey'adaha kale ee shaqo wadaagga la'ah sida hey'adaha Midowga Afrika
   e) Dhiirigelinta iyo is-waafajinta siyaasadaha, istaratiijiyadaha ee lagu dhaqangeli karo heshiiskan.
   f) Dhismaha Hey'ado, Guddiyo iyo Khubaro wakiil ka'ah Golaha Wasiirada
   g) Diyaarinta xeerarka iyo hab-raacyada wakiillada Golaha wasiirada si'loo gaaro u jeedada iyo u gudbinta Golahaguud si loo ansixiyo

h) Kormeerka iyo korjoogteynta howlaha Gudiyada, Hey'adaha howl-wadeennada Kooxaha ee lagu dhisay heshiiskan.
i) Tix-gelinta warbinnada iyo howlaha Xog-heynta iyo qaadista tallaabada ku habboon.
j) Soo saaridda Dekereetoyin iyo Xeer nidaamiyaal si'waafaqsan heshiiska
k) Dhisidda iyo u soojeedinta Golaha Sare saraakiisha iyo xeerka maaliyadda si loo ansixiyo
l) Aqbalaadda howlaha shaqo ee Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Africa iyo Hey'adaheeda
m) Ogolaashaha howlaha Shaqo Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Hey'adaheeda.
n) Tix-gelinta miisaaniyadda Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo hey'adda dejisay kadib soo-jeedinta Jamciyadda ayadoo lasoo marayo Golaha Fulinta
o) Talo siinta Jamciyadda eek u aaddan fasiraadda heshiiskan iyo
p) Qabashada howl-kasta ee kucad heshiiskan ama ay codsato jamciyadda

4. Kulamada caadiga ah Golaha wasiirada waa 2 jeer sanadki waxaa kale ee jiri kara kulan aan caadi ahayn haaddii loo-baahdo
5. Go'aanada Golaha waa in ay ku sal go'naadaan Awoodooda sharciga ah ee Golaha waane waajib in ay fuliyaan xubnaha saxiixay heshiikan
6. Dowladaha Xubnaha ka'ah waa ay qaadi karaan tallaabooyinka lama huraanka u ah fulinta go'aanada Golaha wasiirada

## Qod.12aad

## Guddiga khubarada Sare ee Ganacsiga

1. Guddiga khubarada sare ee Ganacsiga waxa uu ka koobnaanayaa saraakiisha maamul ee ugu sareeya ama Masuulkii ay u igmadaan dowladaha xubnaha ka ah heshiiskan.
2. Shaqada khubarada sare waxa ay tahay:
   a) Fulinta Go'aanada Golaha wasiirada si waafaqsan heshiiskan.
   b) Waxa ay masuul kayihiin horumarinta barnaamijyada iyo dejinta Qorshe howleedka si'loo dhaqangeliyo heshiiskan
   c) Kor-joogteynta howlaha horumarineed ee Aagga Ganacsiga xorta ah ee Qaaradda Afrika si'waafaqsan heshiiskan
   d) Dhisidda Guddi hoosaadyo waa haddii ay tahay lama huraan

e) Kor-joogteynta fulinta si'waafaqsan heshiiskan ama waxaa ladhisayaa Guddi farsamo ee baara xaalad kasta ee gaar ah
f) Hagidda xoghaynta iyo
g) Qabashada howl-kasta ee uu siinayo heshiiskan ama ay ka codasadaan Golaha wasiirada

3. Iyadoo laga talo qaadanayo Golaha Wasiirada Gudiga sare ee Golaha Ganacsatada waxa ay kulmayaan ugu yaraan 2 jeer sanadkiiba waana in ay ku shaqeeyaan xeerarka iyo hab-raacyada uu jideeyay Golaha Wasiirada
4. Go'aanada ka soobaxa kulamada Gudiga waa in ay u gudbiyaan Golaha wasiirada
5. Gudiga Dhaqaalaha ee Gobalka waxa ay leeyihiin latalin.

## Qod.13[aad]

## Xog-heynta

1. Golaha Sare waa in ay dhistaa Xog-heyn leh qaab-dhismeed, xarunta iyo Miisaaniyadda ay ku shaqeyso
2. Xog-heynta waa kumeel gaar inta laga dhameestirayo si' buuxda
3. Xog-heynta waxa ay yeelanayaan shaqsiyad qaanuuni ah wane u madax bannaantahay shaqadeeda si'waafaqsan heshiiskan
4. Xog-heynta waxa ay katirsantahay Midowga Afrika
5. Dhaqaalaha iyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee Xog-heynta waxa dejinaya Midowga Afrika
6. Kaalinta iyo mas'uuliyadda Xog-heynta waxa diyaarinaya Golaha wasiirada

## Qod.14[aad]

## Habka Go'aan qaadashada

1. Habka go'aan qaadashada ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa in lagu gaaraa hanaan wada ogol
2. si waafaqsan Faqradda 1 aad, Gudiga Sare ee khubarada Ganacsiga waxa uu gudbinayaa waxkasta oo aan laga gaarin heshiis wada ogol ah Golaha wasiirada, sidookale haddii aaney Golahu ku ansixin wada ogol waa in Golaha wasiirada u gudbiyaa Golaha Sare

3. Go'aan qaadashada hannaanka farsamo waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda fudud ee Dowladaha Xubnaha ka'ah heshiiskan ee leh xaqa codeybta
4. Go'aanada guud ahaan ha'ahaadeen xallin mushkilad ama go'aan kaleba waxaa lagu gaari karayaa aqlabiyadda fudud ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee leh xaqa codeybta
5. Dowlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxa ay leedahay xaqa codeynta lagamana hor-istaagi karo xaqa codeynta si aan waafaqsaneyn heshiiskan

**Qod.15$^{aad}$**

**Tanaasulka Waajibaadka**

1. Xaalad gaar ah darteed, codsiga soo jeedinta ee tanaasulka waajibaad ee Dowlad xubin ka ah heshiiskan waa in go'aanka Golaha uu ku saleesnaadaa Afar-meelood Seddax marka lawaayo wada ogol
2. Ansixinta codsiga qoseeya tanaasulka waa jibka lasaarey Dowlad xubin ka'ah heshiiskan waa in in ahaada wada ogol. Golaha wasiirada waa in ay codsiga ku meel mariyaa waqti go'an mana dhaafi karo 90 maalmood haddi aan lahelin go'aan wada ogol ah waxa go'aanka lagu saleynayaa Afar meelood seddax (4/3) ee Dowladahha Xubnaha ka'ah heshiiskan
3. Xaalado gaar ah darteed Go'aanka ogolaashaha ee tanaasulka waajibaadka ee Golaha wasiirada waa la kordhikaraa ilaa hal sano waana in Golaha wasiirada ay dib u eegis kusameeyaan sanad kasta si ay u hubiyaan sii socoshada go'aankan iyo waxa kadhashay. Golaha wasiirada waxa ay dib u eegista kudari karaan waqti.

**Qaybta IV**

**Hufnaanta**

**Qod.16[aad]**

**Faafin**

1. Dowlad kasta ee Xubin ka'ah heshiiskan waa in ay ku faafisaa  meelaha ay ku faafiso shuruucdeeda kuna faafisaa mid kamid ah luuqadaha midowga Afrika iyo siyaabaha kale ee waafaqsan xeerka caalamiga ah iyo Qodobada heshiiskan
2. Qodobada heshiiska kama hor imaakaraan sharciga dhaqangalay iyo danaha Qaran ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan.

**Qod.17[aad]**

**Ogeysiin**

1. Ansixinta Sharciyada, xeerarka iyo hab-raacyada xeerka caalamiga ah ee la xiriira ganacsiga si'waafaqsan heshiiskan ayadoo lagu qorayo mid kamid ah luuqadaha Midowga Afrika loona diraayo Dowladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan iyadoo lamarinayo Xog-heynta
2. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay xaq u leedahay in ay kacabato saameynta xun ee xeerarka iyo hab-raacyada xeerka caalamiga ah ee la xiriira ganacsiga kana hor-imaanaya heshiiskan ama danaheeda gaarka ah.
3. Codsiga dowlad xubin ka'ah heshiiskan ee ku wajahan dowlad kale ee xubin ah waa in lasoo mariyaa Xog-heynta waana in ay xog-heynta si'aan daah kujirin u dirtaa dowladda uu ku wajahanyahay kana jawaabaa dhibaatooyinka iyo mas'uuliyad darrada ee horay loo soogaarsiiysy.
4. Ogeysiiska iyo warbixin kasta ee lagu caddeeyay Qodobkan waa in la waafajiyaa heshiiskan

**Qaybta V**

## Kala doorashada Qaaradeed

### Qod.18aad

### Kala doorashada Qaaradeed

1. Iyadoo lafulinayo heshiiskan Dowladaha xubnaha ka aha heshiiskan waxa ay geli karaan heshiisyo u dhexeeya dowladaha dhexdooda oo ah is-dhaafsi dano labada dhinac ay wadaagaan
2. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in lagu qadariyaan heshiiska ay lagasho dowladaha kale ee xubnaha ka'ah heshiiskan iyo kuwa aan ka'ahayn ee ah darafka seddaxaad ah si'waafaqsan heshiiskan
3. Heshiiskan maburi karo mana tirtirin karo heshiisyada ka horreeyay ee xubnaha ay lagaleen dowlado kale.

### Qod.19aad

### Iska hor imaadka heshiisyada

1. Haddii ay dhacdo iska hor-imaad heshiiskan iyo heshiisyo Goboleed kasta waxaa ladabaqayaa heshiiskan haddii aan si'kaduwan loogu sheegin heshiiskan
2. Iyadoo ay jirto farqadda 1 aad ee Qodobkan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee xubin ka'ah urur Goboleedyo Ganacsi waa in ay qiimeeyaan yaa dan uh ama u wanaagsan is-dhexgalka bulsho

## Qaybta VI

## Xallinta Khilaafaadka

### Qod.20aad

### Xallinta Khilaafaadka

1. Hannaanka xallinta khilaafaadka ee lagu sheegay heshiiskan waxa uu quseeyaa khilaafaadka ka dhexdhasha Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan
2. Hannaanka xallinta khilaafaadka waa in loo maraa si waafaqsan heshiiskan

## Qaybta VII

## Gabagabada Qodobada

## Qod.21aad

### Qodobada aan lasocokarin heshiiskan

Fasiraadda qodobada heshiiskan waxaa loo fasirayaa si'waafaqsan mabaadi'da guud ee heshiiskan, xeerarka kale ee xeriirka laleh heshiiska iyo wax kabedelka heshiikan

## Qod.22aad

### Ogolaashaha,Saxiixa, Ansixinta iyo kubiiriadda heshiiskan

1. Heshiiskan waxa lagu meelmiranaya shirweyne guud
2. Heshiiskan waa u furanyahay in ay Saxiixaan, Ansixiyaan ayna kusoo biiraan Dowladaha xunaha ka'ah midowga Afrika si waafaqsan Dastuurka Midowga Afrika

## Qod.23aad

### Dhaqan galka heshiiska

1. Heshiiska iyo protokoolka Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada iyo xeerka xalinka khilaafaadka waxa uu hirgelayaa **30** maalmood kadib marka ay ansixiyaan 22 dowladood oo kamid ah dowladda xubnaha ka ah heshiiska.
2. Heshiiska laxariira maalgashiga ganacsiga, xuquuqda hanti maskaxeedka, Siyaasadda Tartanka waxa uu hirgelayaa **30** maalmood kadib marka ay ansixiyaan 22 dowladood oo kamid ah dowladda xubnaha ka ah heshiiska.Dowlad kasta ee saxiixday heshiiskan waxaa waajib qaanuuni ku ah in ay ilaaliso laga billaabo maalinta ay keento ogolaashaha heshiiskan
3. Dowlad kasta ee ku biireysa heshiiskan, Protokoolka Ganacsiga badeecadaha, Adeegyada iyo Hanaanka xalinka khilaafaadka waxa uu dhaqan gelinyaa kadib taariikhada la dhameestiro ku biiritaanka.
4. Dowlad kasta ee ku biireysa heshiiskan, Protokoolka Maalgashiga, lahaanshaha xuquuqda Hanti maskaxeedka iyo siyaasadda tartanka waxa uu dhaqan gelinyaa kadib taariikhada la dhameestiro ku biiritaanka.

5. Xafiiska ladhigay Dokumintiga codsiga kaqeybgalka heshiiskan waa in uu bixiyaa ogeysiis ku wajahan dhammaan Dowladaha xubnaha ka' ah heshiiskan iyo lifaaqiisa.

## Qod.24aad

**Xafiiska Araajida**

1. Xafiiska ladhigayo araajida kaqeybgalka heshiiskan waa in uu yeeshaa Gudoomiye.
2. Heshiiskan waxa lagu keydinayaa xafiiska araajida waana in uu nuqul kasiiyaa dhammaan Dowladaha saxiixay heshiishkan
3. Dowladda xubinta ah waa in ay xafiiska keydinta Dokumintiyada dhigtaa codsiga Ansixinya ama kamid noqoshada heshiiskan
4. Xafiiska ladhigay codsiga kamid noqoshada heshiiskan waa in uu wargeliyaa dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan

## Qod.25aad

## Kagaabsi Qodobo gaar ahaaneed

Wax kagaabsi ah lagama samey karo heshiiskan.

## Qod.26aad

## Diiwaangelin iyo wargelin

1. Heshiiskan waxa uu dhaqangelayaa marka laga diiwaangeliyo xafiiska Diiwaangelinta ee Xog-haayaha Qaramada Midoobay si'waafaqsan Qod.102 ee axdiga Qaramada Midoobay.
2. Dowladaha xubnaha ka ah heshiiskan si' kali-kali ama wadajir ah waa in ay ogeeyssiiyaan heshiiskan Ururka Ganacsiga Dunida

## Qod.27aad

## Kalaabashada Heshiiskan

1. Heshiiskan waxaa laga bixi karaa kadib **5** sano marka uu dhaqalgal kunoqday Dowladda codsatay ka bixitaanka waana in loodiraa codsigan dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan.
2. Kalaabashada heshiiskan waxa uu dhaqangal noqonayaa **2** sano kadib marka ay soobaxdo warqadda caddeynta ee xafiiska keydka ama taariikhda gaarka ah ee laguxusay warqadda xafiiska Kerydka
3. Kalaabashada heshiiskan masaamey doonto xuquuqaha iyo waajibaadka Dowladda ee ka horeeyay kabixitaanka heshiiskan

## Qod.28aad

**Dib-u eegista Heshiiskan**

1. Heshiiskan waa in lagu sameeyaa Dib-u-eegis **5** sano ee kasta iyadoo laga billaabayo marka uu dhaqalgalo heshiiskan, Dowladaha xubnaha ka'ah waa in ay hubiyaan guulaha laga gaaray heshiiskan sida hormarka is-dhexgalka Ganacsiga iyo siada uu u dhaqangalay
2. Iyadoo laraacayo hannaanka dib-u-eegista waxa ay sameeykaraan soo-jeedin ku saabsan wax-kabedelka heshiiskan si'waafaqsan Qodobka 29 aad ee heshiiskan marka ay qiimeeyaan hannaanka fulineed ee heshiiskan, iyo guulaha laga gaaray fulinta.

## Qod.29[aad]

## Wax-kabedelka Heshiiskan

1. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay leedahay xaqa soo-jeedinta waxkabedel waana in lageeyaa xafiiska Keydinta.
2. Soo-jeedinta waxkabedelka waa in **30** maalin gudaheed lagu ogeysiiyaa Dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan iyo xog-heynta
3. Dowladaha doonaya in ay ka falceliyaan soo-jeedinta waa in 60 maalin gudaheed ku keenaan falcelinta iyagoo xafiiska keydinta Dukumintiyada iyo xafiiska xog-heynta
4. Falcelinnada iyo soo-jeedinta ladhigay xafiiska xog-heynta waa in loo diraa Gudiyada iyo Giddi hoosaadyada xubnaha ka' ah hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika.
5. Falcelinnada Guddiyada iyo Guddi hoosaadyada shaqada ku leh waa in geeyaan xafiiska xog-heynta. Xafiiska Xog-heynta waa in uu falcelintaas u gudbiyaa Golaha wasiirada.
6. Wax kabedelka Qodobada waa in lagu ansixiyaa shir-weyne.
7. Wax-kabedelka Heshiiskan waxa uu ku guntamayaa marka laraaco hab-raaca Qodobka 23aad ee heshiiskan

## Qod.30[aad]

## Qoraalada Rasmiga ah ee heshiiskan

Heshiiskan waa in laga sameeyaa 4 Nuqul oo asal iyo isku mid ah kuna qoran afafka Carabiga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Boortaqiiska

**Barotokool gaar u ah ka Ganacsiag Badeecada**
**Hordhac**

Annaga oo ah Dowladaha Xubnaha ka'ah ururka midowga Afrika,

Annagoo ka duuleyna fulinta go'aanki ka soobaxay shir madaxeedkii midowga Afrika ee Magaalada Adis-Ababa ee Dalka Ethiopia 29-30 Janaayo 2012 si loo sameeyo ra'yi uruurin, Qorshe-howleed iyo qaab-dhismeed u jeedadiisu tahay sidii loo dedeji lahaa dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo Xoojinta Ganacsiga gudaha ah ee Qaaradda Dhexdeeda

Annagoo tix-raaceyna go'aanaddii ka soobaxay shir-madaxeedkii Madaxda Midowga Afrika ee Magaalada Johannesburge ee Dalka Koofur Afrika 14-15 juun 2015 kaas oo tirsigiisu ahaa 569 iyadoo latix raacayo miraha heshiiska Abuuja ee lagugaaray Magaalada Abuuja ee Dalka Nigeria ee ahaa Shirki 25 aad ee Madaxda Midowga Afrika kaas oo tilmaamaaye mabaa di'a ay kamid yihiin dhismaha Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ujeedkiisune ay tahay is-dhexgalka Afrika.

Annagoo go'aansanay in aan yareeyno Qiimaha si'loo abuurto Ganacsi iyo annagoo abuurnay jawi ku habboon hormarinta ganacsiga gaarka ah iyo is-dhaxgalka ganacsiga

Annagoo go'aansanay in aan sare u qaadno heerka tartan warshadeed ee Qaaradda Afrika si'loo abuuro suuq dhaqaale ee kudhisan iskaashi Afrika

Annagoo kukalsoon in aan sameeyno sharci gaar u ah kaganacsiga Badeecadaha ujeedkiisu tahay horumarinta iyo isku xirka dhaqaalaha, maalgashiga, horumarinta arrimaha Bulshada iyo baabi'inta caqabadaha kuhor gudboon ee Ganacsatada Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan

Annagoo ballan kuqaadnay in aan xoojinno is-dhaxgalkaGanacsi ee Qaaradda Afrika iyadoo la'adeegsanayo is-waafajinta shuruucda Afrika, isku xirka ganacsiga xurta ah, fududeynta safarrada Ganacsi ee Qaaradda, maalgelinta kaabayaasha Dhaqaalaha, cilmiga, teknoolajiyada iyo fulinta halbeeg Ganacsi horumarsan

Anaagoo Aqoonsan heerarka horumarin ee kala duwanaashaha Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan iyo haqabtirka baahida, mucaamilaadka gaar ahaaneed iyo gacan siinta farsamo ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiska ee qaba baahida

Waxaan ku heshiinnay Qodobada Soo-socda:

## Qaybta I
## Eray-bixnno, Ujeedooyin iyo xadka
## Qodobka1[aad]
## Qeexitaanno

Ujeedada erayadan waxaa Erayada macnahooda waxaa loo fasirayaa sida hoos ku qoran:

a) "**Heshiiska hafinta Badeecadaha**": waxaa loola jeedaa fulinta heshiiska Ururka Ganacsiga Adduunka Dunida si'waafaqsan Qod.6 aad ee heshiiska Guud ee kusaabsan sar-goynta canshuuraha ganacsiga ee 1994

b) "**Guddi":** waxaa loola jeedaa Guddiga Ganacsiga Badeecadaha ee lagu dhisay Qod.31 aad ee hesiiskan gaarka ah

c) " **waajibaadka Furdooyinka":** waxaa loola jeedaa canshuuraha lasaaro nuucyada kala duwan ee badeecadaha ladhoofiyo ama lasoo dejiyo

d) "**Hannaanka Mideynta":** waxaa loola jeedaa hannaanka mideynta shuruucda lagu mideynayo caddeymaha badeecadaha ee ku dhisan heshiiaka caalamiga ah iyo tiriskooda numbareed.

e) **"Caqabadah aan ahayn canshuur":** waxaa loola jeedaa caqabadaha ku horgudboon ganacsiga ee aan ahayn canshuurta waajibtay

f) "**Asalka Wax-soosaar ":** waxaa loola jeedaa Badeecada ku guuleestay Asalka wax soosaarka ee xeerarka Asalaka badeeadaha ee lifaaqa 2aad ee heshiiskan.

g) **"Kala doorashada Ganacsiga":** waxaa loola jeedaa Abaabulka ganacsi ee labo geeskoodka ah ee dowlad kamid ah heshiiskan ay siiyo dowladda kale iyadoon wax dhaafsaneyn.

h) "**Heshiiska Bedqabka":** waxaa loola jeedaa heshiiska bedqabka ee Ururka Ganacsiga Dunida

i) "**Jaan tusyada wada xaajoodyada Tariifooyinka":** waxaa loola jeedaa liiska wada xaajoodyada ee laxariirta canshuraha badeecadaha ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waana in ay ku dhacdaa daah-

furnaan si'waafaqsan Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

j) **"TBT":** waxaa loola jeedaa caqabadaha farsamo ee Ganacsiga iyo

k) **"TBT Agreement":** waxaa loola jeedaa Heshiiska Ururka Ganacsiga Dunida ee caqabadaha farsamo ee Ganacsiga

## Qodobka 2aad

## Ujeedooyinka

1. Ujeedada guud ee heshiiskan Gaarka ah waa in la'abuuro Suuq Ganacsi ee xor ah si'waafaqsan Qod.3 aad ee heshiishka
2. Ujeedada gaar ahaaneed ee heshiiskan gaarka ah waa in laxaqiijiyo is-dhaxgalka Ganacsi ee Qaaradda Afrika ayadoo loomarayo:
   a) Baabi'inta Qiimaha go'an ee canshuuraha
   b) Baabi'inta caqabadaha aaan canshurta aheyn isla markaana lidka ku ah Ganacsiga
   c) Sare u qaadida Hanaanka Furdooyinka iyo fududeenta howlaha Ganacsi
   d) Sare u qaadidda wada shaqeynta in laga gudbo caqabadah lidka ku ah Ganacsiga iyo halbeegyada Ganacsiga
   e) Horumarinta iyo dhiirigelinta Gancsiga Gobalka iyo kan Qaaradda Afrika
   f) Sare u qaadidda horumarinta dhaqaalaha Bulshada, kala duwanaanshaha iyo wershadeynta Afrika oo dhan.

## Qodobka 3aad

## Xadka heshiiskan gaarka ah

1. Qodobada heshiiskan gaarka ah waa in lagu dabaqaa Ganacsiga Badeecadaha ee u dhexeeya Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan
2. Jaantusyada lifaaqa 1 aad go'aamada canshuuraha, liqaaqa 2 aad ee xeerarka laxariira tayada badeecadaha, lifaaqa 3 aad Gooabaha canshuuraha iyo maamulka, lifaaqa 4 aad Fududeynta Ganacsiga, lifaaqa 5aad xalka dhibaatada Gabnacsiga, lifaaqa 6aad farsamada dhibaatada Ganacs, lifaaqa 7aad hal-beegyada nadaafadda, lifaaqa 8aad kalssoni abuurka, iyo lifaaqa

9aad ee magdhawyada Ganacsiga dhammaan lifaaqyada waxa in ay qeyb muhiim ah kayihiin heshiiskan gaarka ah

## Qaybta II

## Sinnaanta

### Qodobka 4aad

### Mudnaan isku wada mid ah

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay ka heshiiyaan dowladaha leh mudnaanta si'waafaqsan Qod.18 aad ee heshiiskan
2. Heshiiskan waxa uu ogolyahay in Dowladkasta ee xubin ka'ah heshiiskan gaarka ah qeyb kanoqo karto heshiis dowlad xubin ah ama aan xubin ka'aheyn
3. Heshiiskan waxa uu ogolyahay in labo dowlad ama kabadan ay sameykaraan iskaashi laxiriira sida ay u meel mari lahaayeen u jeedooyinka heshiiskan
4. Iyadoo ay sidiideeda u taaganyihiin Farqadaha 2 iyo 3 ee Qodobkan, Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan qasab kuma aha in ay iskaashi sameeyaan. Dowladda xubinta ah waa in ay wada xaajood kagashaa qaabka mudnaansiinta ee laxariira heerka dhaqaale ee Dowlaha xubnaha ka'ah heshiiskan

### Qodobka 5aad

### Mudnaan isku mid ah

Dowladda xubinta ah waa in ay heshiis ka gashaa wax soosaarka ay u dhoofisa Dibadda wax aan kayareyn qiimaha lagu iibiyo sicirka Gudaha marka lagabixiyo canshuurta si'waafaqsan Qod.3 aad ee heshiiska Guud janngoynta canshuuraha Ganacsiga ee 1994

### Qodobka 6aad

### Mudnaanta Gaarka ah

Si'waafaqsan ujeedada Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa in ay hubisaa is-fahamka iyo isweydaarsiga faa-iido ee ganacsi ee dhaexmara laba dowlad ama kabadan ujeedkutahay meelmarinta heshiiskan

## Qaybta III

## Xoreynta Ganacsiga

## Qodobka 7aad

## Canshuuraha soo-dejinta Badeecada

1. Baabi'inta canshuuraha xad-dhaafka ee lasooro badeecadah taas oo dhibaato ku ah Dowlad xubin ah si'waafaqsan jaantuska lifaaqa 1aad ee heshiiskan gaarka ah.
2. Ganacsiga xorta ah darteed Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in aaney soo saarin canshuur cusub ee lasooro badeecada haddi aan heshiiskan gaarka si'kale u sheegin
3. Canshuurta soodejinta Badeecadaha waxa ay tahay nooc kasta ee badeecada kamid ah ee katimid Dowlad xubin ah heshiiskan mana lasaari karo wax canshuur dheeraad ah balse kumajikaraan kuwa soosocda:
   a) Canshuurta u dhiganta tan lasaaro badeecada guda ah si'waafaqsan Qod.3 aad Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994 waana in la'ilaaliyaa anshaxa tartanka Badeecadaha
   b) Magdhawyada Canshuuraha si'waafaqsan Qodobada 6aad iyo 16 ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994,Heshiiska Ururka Gnaacsiga Dunida iyo Qodobada 18aad iyo 19aad ee heshiiskan Gaarka ah iyo
   c) Qiimaha lacageed ee joogtada ah si'waafaqsan Qodobka 8aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994

## Qodobka 8aad

## Jaantuska canshuuraha

1. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in ku dhaqantaa canshuurta soodejinta badeecadaha si'waafaqsan jadwalka kucad lifaaqa 1 aad ee heshiiskan Gaarka ah waana in lagawada xaajoodo si'uu noqdo qeyb muhiim ah kamid ah heshiiskan
2. Iyadoo ay jiraan Qodobada heshiiskan gaarka ah, Dowlad xubin ka'ah Urur Gobeedka Dhaqaalaha Afrika ee leh suuq xor ah oo ka heer sareyso

kana gudbay caqabadaha Ganacsiga waxa ay Dowladda xubinta ka'ah heshiiskan ula dhaqmeysaa sida dowlad xubin ka'ah heshiiska

## Qodobka 9$^{aad}$

## Xaddidaad canshuuraha

Dowlaha xubnaha ka'ah heshiiskan masamey karaan wax dulsaar ah canshuuraha dhoofinta iyo soo-dejinta badeecadaha haddii aan si'kale loogu sheegin heshiiskan ama lifaaqa iyo Qodobka 15aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994 ama Qodobada heshiiska Ururka Dhaqaalaha ee Afrika

## Qodobka 10$^{aad}$

## Canshuuraha Badeecadaha la dhoofiyo

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay saarayaan canshuur Badeecadaha ay dhoofiyaan canshuur u dhigata tan loo-soo dhoofiyo Dowladdaas
2. Waa in canshuurta Badeeco kasta ee la ee la dhoofinayo Dowladaha xubnaha ka'ah heshiishkan ay waa fajiyaan Qodobkan aydoo aaney jirin wax kala sooc ah
3. Dowladda xubinta ah ee dooneysa in ay soo-bandhigto canshuurta badeecadaha ay dhoofiso si'waafaqsan faqradda 2 aad ee Qodobkan waa in ogeeysiiskan u dirtaa xog-heynta muddo **90** cisho gudedeed ah

## Qodobka 11$^{aad}$

## Wax kabedelka Canshuuraha Badeecadaha

1. Xaalado gaar ah darteed, Dowlad xubin ah waxa ay codsakartaa wax kabedel jadwalka qiimaha canshuurta
2. Dowladda xubinta ah ee dan kale wax kabedelka jadwalka qiimaha canshuurta waa in lagu hagaajiyaa Xog-heynta codsiga qoraal lagu caddeynayo xaaladdaas gaarka ah.
3. Iyadoo latixraacayo codsiga waa in xog-heyntu ay codsiga u dirtaa dhammaan Dowlaha xubnaha ka'ah heshiiskan

4. Dowladda xubinta ka ah ee dan kaleh codsiga soo gaaray waxa ay ka faceli kartaa codsigan muddo aan kabadneen 30 maalin oo kabillabaneysa maalin uu soogaaray codsiga waana in ay u geeyaan xog-haynta oo ay waajib tahay in uu gaarsiiyo dhammaan Dowladaha xubnah ka'ah heshiiskan
5. Dowladda codsatay wax kabedelka canshuurta iyo Dowladaha kale heshiiska xubnaha ka'ah ee kuxusan faqradda 3aad ee Qodobkan waa in kawada xaajoodaan iyagoo qiimeynaya magdhawga.
6. Waa in lagaar siiyaa Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan natiijada kasoo baxda wada xaajoodka iyo mag-dhawga kadhashay wax kabedelka canshuuraha. Magdhawga waxaa looraacaya si'waafaqsan Qodobka 4aad ee heshiiska Gaarka ah
7. Wax kabedelka waxa uu dhaqan gelayaa marka Dowladda xubinta ah ee lasaaray magdhawga bixiso si'waafaqsan faqradda 6aad ee Qodobkan waana in ay ansixiyaan xukunka magdhawga Golaha wasiirada lana gaarsiiyaa Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan

## Qodobka 12aad
## Baabi'inta caqabadah aan ahayn canshuurta

Marka laga reebo Qodobada lagu caddeeyay heshiiskan, caddeymaha caqabadah, Nuuca iyo maamulka qaabka looga baabi'inayo caqabadaha ganacsiga ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in looraacaa si'waafaqsan lifaaqa 5aad ee heshiiskan

## Qodobka 13aad
## Asalka Badeecada

Shuruudaha lama huraanka u ah tayada Badeecada ay soo saarto Dowlad xubin ka'ah heshiisakan waxaa loo laraacaa si'waafaqsan lifaaqa 2aad ee heshiiskan

## Qaybta IV

## Iskaashiga furdooyinka, fududeynta Ganacsiga iyo siiheynta Badeecada

### Qodobka 14aad

### Iskaashiga furdooyinka iyo maamulka

Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay yeela kraan wada shaqeyn iyo iskaashi maamul dhinacyada canshuuraha si'waafaqsan lifaaqa 3aad

### Qodobka 15aad

### Fududeynta howlaha Ganacsiga

Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay fududeeyaan howlaha Ganacsi si'waafaqsan lifaaqa 4aad ee heshiiskan

### Qodobka 16aad

### Siiheynta Badeecada

Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay sii hayaan badeecada si'waafaqsan lifaqa 8aad ee heshiiskan

## Qaybta V

## Badbaadada Ganacsiga

### Qodobka 17aad

### Badbaadada Ganacsiga

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan eek u xad-gudubka Qodobkan qodobkan waxaa laga qaadayaa Magdhawga Ganacsi
2. Dhaqangelinta magdhawga ee Qodobkan waxaa loo tix raacaya si'waafaqsan Qodobka 9aad ee lifaaqa heshiiskan iyo Qodobada magdhaw ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ama waxaa looraacaya hab waafaqsan magdhawga Ganacsiga ee heshiiska Ganacsiga Dunida

## Qodobka 18aad

## Ilaalinta Badqabka Ganacsiga

Dhaqangelinta Qodobkan waxaa loodabaqayaa si'waafaqsan lifaaqa 9aad iyo Qodobka 19aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994 iyo Hesiishka Ururka Gnacsiga Dunida

## Qodobka 19aad

## Mudnaansiinta Badqabka Ganacsiga

1. Dowlad xubin ah waa ka dacwookartaa haddii ay dowlad kale ee xubin ah kasoogaaraan badeeco yeelata ceebo ama sababta waxyeello khatar ah ama dhibaato u geeysata wax soosaarka gudaheeda ah
2. Dhaqangelinta Qodobkan waxaa loo dabaqayaa hab waafaqsan lifaaqa 9aad ee heshiiskan ee ku saabsan Magdhawga Ganacsiga iyo Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

## Qodobka 20aad

## Iskaashi dhinaca Magdhawga iyo Baarista Badqabka Badeecada

Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay iska kaashadaan Magdhawyada si'waafaqsan lifaaqa 9aad ee heshiiskan iyo Qodobada nidaaminaya Magdhawga ee Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

## Qaybta VI

## Heerarka Waxsoosaarka

## Qodobka 21aad

## Khataraha farsamo ee Ganacsiga ku horgudban

Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa si'waafaqsan lifaaqa 6aad ee heshiiskan

**Qodobka 22aad**

**Tallaabooyinka bedqabka iyo fayadhowrka**

Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa si'waafaqsan lifaaqa 7aad ee heshiiskan

## Qaybta VII

## Siyaasado is-dhameystiraya

**Qodobka 23aad**

**Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah**

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay taageeri karaan dhismaha Aag dhaqaale ujeedkiisu tahay sare u qaadidda Dhaqaalaha Afrika waxaana Maamulaya Golaha wasiirada
2. Dhaqaalaha kasoobaxa Aagga waxaa loo adeegsanayaa horumarinta shuruucda Afrika iyo warshadeeynta Qaaradda Afrika
3. Ganacsiga iyo Dhaqaalaha ka dhasha Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Afrika waaxa waxaa lagu dhaqayaa si'waafaqsan lifaaqa 2aad ee heshiiskan

**Qodobka 24aad**

**Warshadaha yaryar**

1. Dhismaha warshado cusub waa mid u baahan in ay ku timaad Qorshe heer Qaran ah oo u baahan taxadir khataraha ka'imaakara warshadaha waana in lagu qeybiyaa hab caddaalad ah
2. Golaha wasiirada ayaa waa in ay dhaliyaa qaabka dhaqangalka ee Qodobkan

**Qodobka 25aad**

**Waxyaabaah lama huraanka u ah Hufnaanta Shirkadaha Ganacsi**

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in Xog-heynta u soo gudbiyaan hey'adahooda Ganacsi si'loo hubiyo hufnaanta shaqada
2. U jeedada faqradda sare Hey'adda Ganacsi waxa looqaada karaa Hey'ad Dowladeed ama aan Dowlad laheyn waxaa kamid Hey'adaha suuqgeynta Ganacsiga, ama he'ad kasta eel eh awood Dastuuri ah ee iibka, dhoofin

badeeco ama soo-dejin si'waafaqsan Qodobka 17aad ee Hesiiska Guud ee canshuuraha Ganacsiga ee 1994

## Qaybta VIII

## Qodobada Karreeban Heshiiskan

## Qodobka 26aad

## Qodobbo Guud

Lama Hirgalikaro Qodobda Heshiiskan ee lama huraan u ah wada xaajood kudhisan caddaalad ee u dhexeeya Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ama kahor imaanaya xeerka caalamaiga ah ee laxiriira Ganacsiga iyoka hor imaanaya Qodob sharci oo dhqangalay kana horreeyay heshiiskan Dowlad kasta mahirgeli karto heshiiskan:

a) Lama huraan ah in uu ilaaliyo anshaxa guud ee Dowladda
b) Lama huraan ah in uu ilaaliyo Dadka, Xoolaha, Dhirta iyo caafimaadka
c) In ku saabsanaadaa Dhoofin iyo soo-dejin Dahab ama Qalinka
d) Aan ka shaqeyn addonsi maxaabiista
e) Laga huraan ah ee aan lasoco Karin heshiiskan oo ay kamid yihiin caado Dhaqameed hirgalay.
f) Haddii uu heshiiskan uu khatar grlinayo Keydka dhaqaale ee Dowladda ama taariikhda Dowladda
g) Haddii uu heshiiskan uu si toos ah uga hor-imaanayo ama dhaawac xun u geeysanayo daryeelka iyo wax soosaarka Dalka
h) Haddii uu heshiiskan uu ka hor imaanayo waa jibaadka iyo heshiis ay wada galeen Dowlad Goboled ee ansixiyeen Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan
i) Haddii uu heshiiskan uu hhos u dhigayo tirade wax soo saarka ee Gudaha Dowladda ama uu hoos u dhigayo qorshaha iibka iyo qiimaha ee Dowladda ama uu hoos udhigayo wax soosaarka Gudaha dhiirigelinaya soo-dhoofinta badeecadaha

j) Haddii uu heshiiskan uu saameyn xun ku yeesho iibka gudaha iyo mabaadi'da guud ee ah wadaagga wax soosaarka Dunida ama uu toos uga hor imaanayo Qodob kale ee Heshiiskan gaarka ah

## Qodobka 27aad

## Qodobada Bedqabka ee Karreeban Heshiiskan

Qodobada aan ku caddeyn Heshiiskan Gaarka ah waxaa loo fasirayaa:

a) Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay ka caba kartaa waxkasta ee dhib ku ah Danaheeda bedqab ama

b) Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay xaq u leedahay in ay is-hortaag ku sameyso waxkasto oo dhibaato ku ah badqabka wax soosaar ama Ganacsi ee dadkeeda:

   i. Alaabta kala dhambalmikarta ama kala bixikarta
   ii. Aaladaha laxiriira shixnadaha hubka lagu fuliyo dagaalka amaqalabka kale ee ciidamada
   iii. Aaladaha laxiriira shixnadaha xaaladaha degdega ah ee caalamiga

c) Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshisskan waxa ay qaadi kartaa tallaabo kasta ee uu waajib u siinayo si'waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobay eek u saabsan Nabadgelyada.

## Qodobka 28aad

## Habka lacag bixin

1. Haddii Dowlad xubin ka ah heshiiskan ay bixiweydo lacagta go'aannada laga qaadanayo waxaa ladabaqayaa si'waafaqsan xuquuqaha iyo waajibaadka caalamiga ah iyo heshiisyada kale ee Dowladdu xubin katahay sida Heshiiska Ururka Ganacsiga Dunid, Qodobada He'adda lacagta Adduunka iyo Bankiga lacagta Afrika waana in la'ilaaliyaa Niyad wanaagga, caddaaladda iyo sinnaanta
2. Tillaabada laga qaadayo Dowladda xubinta ka'ah heshiiskan ee lagu eedeeday lacag bixi la'aanta waa in la'ogeeysiiyaa dhammaan dhammaan Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan kana soo jawaabaan sida ugu dhaqsiyaha badan oo macquul ah

## Qaybta IX

## Iskaashiga farsamo ee sare u qaadidda awoodda

### Qodobka 29aad

### Iskaashiga farsamo iyo aqooneed ee sare u qaadidda awoodda

Si'loo dhaqangeliyo heshiiskan xog-heynta waa in ay isku xirtaa Dowladah xubnaha ka'ah Ururka Dhaqaale Goboleedka Afrika iyo Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan si'ay u sameeyaan iskaashi Ganacsi iyo dhismaha kaabayaal Dhaqaale si'waafaqsan heshiiskan

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ayaa ka heshiinaya qaabka wada shaqeeynta si'uu u meelmaro heshiiskan
2. Xog-heynta ayaa tilmaameysa melaha ay ka'imaanayaan lacata iyo qaabka lagu fulinayo iskaashiga

## Qaybta X

## Qodobada Marjica u ah heshiiska

### Qodobka 30aad

### Tashisha iyo xallinta khilaafaadka

Haddii aan si'kale loogu sheegin heshiiskan, waxaa ladhaqan gelinayaa Qodobada iyo hab-raacyada kale eek u cad heshiiskan ee la xiriira tashiga iyo xallinta khilaafaadka

### Qodobka 31aad

### Qiimeynta iyo fulinta heshiiskan

1. Si'waafaqsan Qodobka 11aad ee lagu dhisay Guddiga Ganacsiga Badeecadaha ayaa masuul ka' ah howsha fulinta heshiiskan ayagoo Golaha wasiirada u gudbinaya natiijada tallaabada ay qaadeen. Gudiga waxa uu yeela karaa guudi hoosaad si'loo fududeeyo shaqada
2. Haddii aan si'kale loogu sheegin heshiiskan, Guddiga Ganacsiga Badeecadaha iyo Guudi hoosaadka ay dhistaan waxa ay wakiilo matala u yihiin ndhamman Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan

3. Duddoomiyaha Guddiga Ganacsiga Badeecadaha waxaa dooranaya Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan
4. Si'waafaqsan Qodobka 35aad faqraddiisa 5aad ee heshiiska, howlaha xog-heynta waxa ay tahay latalin, diyaarinta warbixin sanadeedka, fududeeynta howlaha shaqo, maamulka iyo korjoogteeynta
5. War bixinnada xog-heynta waa in lasoo marsiiyaa ayna ansixiyaan Golaha wasiirada

## Qodobka 32aad

## Habraaca waxkabedelka Heshiiskan

Waxkabedelka heshiiskan gaarka ah waxaa loo sameykaraa si'waafaqsan Qodobka 29aad ee heshiiskan

## Hordhac

## Baratokool gaar u ah Ganacsiga Adeeg bixinta

Annaga oo ah Dowladaha Xubnaha ka'ah ururka midowga Afrika,

Annaga oo ka duuleyna fulinta u jeedooyinka, mabaadi'da iyo sharciga lagu dhisay Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika, is-dhaxgalka iyo horumarinta Ganacsi ee Qaaradda Afrika;

Annaga oo go'aan sananay in aan sare u qaadno Ganacsiga Adeebg bixinta Adeeg Ganacsi ee xor ah kuna dhisan aas-aas sharci iyo mid dhaqaale u jeedada tahay in lahelo bulsho leh dhaqaale fiican;

Annag oo og baahida loo-qabo in la'abuuro lana ballaariyo Adeeg bixiyayasha si'loo helo Adeeg bixin horumarsan ee ku'aadan heerarka kala duwan sida Urur Goboleedka dhaqaale ee Afrika iyo Guud ahaan Qaarada

Annagoo go'aan sananay in aan sare u qaadno ka ganacsiga Adeeg bixinta Afrika gaar ahaan Adeegyada yar-yar iyo dhexe ee quseeya Afrika;

Waxaan aamin sannahay, xuquuqaha ay u leeyihiin dowladaha xubnaha ka'ah Ururka Midowga Afrika in ay xaq u leeyihiin in ay dabaqaan shauruucdooda Gudaha hadane waxaa waa inlawaa fajinayaa heshiiskan si'uu u helo sharciyad uu kula falgalo ujeedada siyaasadda guud ee Dowladda oo ay kamid tahay: Siyaasadda Tartanka, Daryeelka macaamilka, dhiiri gelinta horumarrada iyo gacan siinta siinta Dowladaha u baahan iyadoo loo fiirinayo hadba heerka ay Dowladdu taagantahay iyadoo aan marna laga tegikarin Daryeelka macaamilka, ilaalinta deegaanta iyo horumar joogta ah ee Adeeg bixinta

Annag oo og jiritaanka xaalado adkeynaya horumarka oo ay kamid yimiin; Dowlad aan lahayn xeeb, Dowlad bad kuwareegsan iyo Dowlad dhaqaala ahaan liidata

Mahadcelin; waxaan u mahadcelineynaa Madaxda Midowga Afrika ee kulankoodi 30 aad ee caadiga ahaay ku yeeshay Magaalada Addis Ababa Dalka

Eithopia 28 janaayo 2018 go'aanka ay ku dhiseen suuqa kaliya ee Gaadiidka Hawada iyadoo la fulinaayo go'aanki Yamoussoukro

Annaga oo aad u og ahmiyadda sare oo ay leedahay in wax leesku darsado adeeg bixin is-gaarsiinta hawada gaar ahaan suuq kaliya ee Gaadiidka Hawada u jeedadu tahay sare u qaadidda isdhaxgalka Ganacsi ee Qaaradda Afrika si'waafaqsan Dhismaha Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika

Waxaan ku heshiinnay Qodobada Soo-socda:

## Qaybta I

## Eray bixin Heshiiskan

### Qod.1[aad]

### Qeexitaanno

Ujeedada Erayada kujira heshiiskan waxaa loo fasirayaa sida soo socota:

a) **"Laan Shirkad Ganacsi":** waxaa loola jeedaa nooc ganacsi kasta ee lagu ogolaaday si'waafaqsan:

i. Dastuurka iyo xeerka kale ee lagu helikaro fasax Ganacsi

ii. Abuurista laan ama wakiil Dowlad xubin ka'ah heshiiskan ujeedkiisu tahay Adeeg bixin

b) **"Canshuurta Tooska ah":** waxaa loola jeedaa dhammaan canshuuraha dakhliga oo ay ku jiraan canshuuraha hantida, canshuuraha guryaha, dhaxalka,

Hadiyadaha iyo canshuuraha Musharaadka

c) **"Shirkad leh shakhdiyad Qaanuuneed":** waxaa loola jeedaa shirkad kasta nooc kasta hala haatee oo faa-iido doon ama aan faa-iido doon ahayn oo sharci ahaan u diiwaangashan si'waafaqsan sharci dhaqalgal ah.

d) "**Shirkad leh shakhdiyad Qaanuuneed":**

i . “**Iskuxiran”:** waxaa loola jeedaa qof leh awood Kontarool kuna leh

qof kale.

ii**. “Kontarool"**: waxaa loola jeedaa wakiillo kasocda Dowlad xubin ah oo magcaabo shakhsiyaadka iyadoo loo eegayo badnaashaha ama si’waafaqsan sharciga

ii. **"Milkiyadda**” shakhsiyaadka Dowladda xubinta ah haddii ay ka badan %50 ee tirada lacagta lamaal geliyay waxaa faa-iida waxaa iskaleh shaqsiyaadkaas Dowladda xubinta ah

e) **"Shirkad ka diiwaan gashan Dowlad kale ee xubin ah**" waxaa loola jeedaa

Shirkad kutimid mid kamid ah qaababka soosocda:

i. Shirkada ganacsi oo lagu dhisay si waafaqsan Dastuurka iyo xeerka kale ee lagu helikaro fasax Ganacsi kana diiwaan gashan dhulka Dowladda ama Dowlad kale ee xubin ah heshiiskan
ii. Haddii ay dhacdo bixinta adeega iyada oo loo marayo ganacsi shirkad diiwaangashan, lahaansho ama ay maamusho waa in:

1. In uu maamulo shakhsi dabiici ah ee metala Dowlad xubin ka’ah heshiiskan ama
2. Shirkad diiwaan gahan sida kucad faqradda “i” ee Qodobkan

F) “**Sharci**": waxaa loola jeedaa sharci kasta ee leh qaab kasta iyo nuuc kasta ee uu yeesho sida xeer, Dekereeto, go’aan ama go’aan maamul

g) **"Shuruucda ay soo saaraan Dowladaha xubnaha ka’ah ee laxiriira Adeegyada Ganacsiga**" waxaa loola jeedaa:

i. iibka, lacag bixinta ee adeegga

ii. isku xirka Ageegyada loo qabto bulshada oo ay bixiyaan Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan

iii. Marka shirkad ama shaqsiyaad ay bixinayaan adeeg Dowlad hubin ka’ah heshiiskan ee aan ahayn Dowladda dalka ay u dhashasheen

h) “**Adeeg loo asteeyaay shirkad ama Qof u gaar ah”:** waxaa loola jeedaa Qof ama shirkad gaar loo leeyahay ama Dowladi leedahay ee loo gaar yeelay in ay bixiso adeeg iyadoo aan la’ogoley tartan

I) “**Qof caadi ah ee Adeeg ka haya Dowlad kale**” waxaa loola jeeddaa Qof caadi ah ee deggan Dowlad xubin ah ee aan ahayn Dowladda ta uu u dhashay waxaa lagu dhaqayaa sharciga Dowlaada uu degganyahay:

i. Waxa uu noqo karaa qof Muwaadin ah ama
ii. Qof lasiiyay deganaasho ku meel gaar ah

j “**Qof”** : waxaa loo lajeedaa Qofka dabiiciga ah ama Qof uu abuuray sharciga

l) “**Qeyb:** waxaa loo lajeedaa qeyb adeeg oo ah:

i. Qeyb ama qeybo bixisa adeeeg gaar ah
ii. Qeybta adeegga bixisa waxa ay yeela kartaa qeybo hoos tagta

**m) “Adeega Dowlad siiso Dowlad kale”:** waxaa loo lajeedaa adeegga Dowlad siiso Dowlad kale waxa uu noqo karaa:

I. In Dowladi ay siiso Adeeg Dowlad kale sida in markab Dowlad kale ka sharciyeeysan uu adeeg u qabto Dowlad kale si’waafaqsan shuruucda badda ama

II. Xaaladaha Qof dabiici ah uu siiyo adeeg Dowlad kale

M) **“Qofka loo qabto Adeegga”:** waxaa loola jeedaa Qofka adeegga ka helaya Adeeg bixiyaha

n) “**Adeeg Bixiye”:** waxaa loola jeedaa Qofka adeegga bixiya ee siiya Adeegga loo adeegaha

O) “**Adeeg Bixin”:** waxaa loola jeedaa Adeeg oo uu kamid yahay waxsoosaar, wax-qeybin, suuq-geyn, iibka iyo gaarsiin Adeeg.

p) **“Ganacsi lagu bixiyo Adeeg”:** waxaa loola jeedaa Adeeg waxaane kamid ah:

i. Adeeg laga bixiyo Dhul Dowlad xubin ka’ah heshiiskan lan geynayo dhulka Dowlad kale ee xubin ah
ii. Dowladda Adeegga loo fidiyaya waxa ay Adeegga lasiiyay gaarsii kartaa Dowlad kasta ee xubin ah
iii. Dowladda Adeegga bixineysa waxa ay adeeg u fidi kartaa Dowlad kaste ee xubin ka ah heshiiskan ee uu u dhexeeyo Ganacsi ayadoo joogta Dhulka Dowladda adeegga loo fidinayo

iv. Dowladda xubinta ah ee bixineysa adeegga waxa ay adeeg sii kartaa Qof dabiici ah ama Dowlad kasta ee xubin ah ayadoo joogta Dhulka Dowladda lasiinayo Adeegga

## Qaybta II

## Xadka ladabi karo Heshiiskan

## Qodobka 2aad

## Xadka ladabi karo Heshiiskan

1. Heshiiskan waxaa lagu dabaqayaa shuruucda ay soo saaraan Dowladaha xubnaha ka'ah ee kusaabsan Ganacsiga bixinta adeegga
2. Ujeedada Ganacsiga adeegga ee heshiiskan gaarka ah waxaa aas-aas u ah 4 ta qeybood ee lagu sheegay Qod 1aad faqradiisa (p) ee heshiiskan garrka ah
3. Ujeedada heshiiskan gaarka ah waxa ay tahay:

a) **"shuruucda ay soo saaraan Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan**": waa shuruucda ay soosaaraan:

i. Dowladaha xubnaha ah, Dowlad dhexe, Dowlad Hoose

ii. Hey'adaha aan Dowliga ahayn ee lasiiyay awoodda wakaalasha in ay shuruuc soo-saarikaraan

Iyadoo lafulinayo waa jibaadka ku xusan heshiiskan gaarka ah Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in qaataa tallabo ay ku dhaqangelineyso si'loo hubiyo faalladadooda ee Dowlad dhexe, Dhowlad Hoose ama Hey'adaha aan dowliga ahayn ee shuruucdooda Gudaha

b) **"Adeeg":** adeeg waa Qeyb kasta oo adeeg ah marka laga reebo adeega lagu bixiyo awoodda Dowladnimada iyo

c) **"Adeega lagu bixiyo awoodda Dowladnimada":** waxaa loola jeedaaAdeeg kasta ee labixyay mid Ganacsi oo lagu tartamayo bixinta adeegga

4. Xadka heshiiskan Gaarka ah waxa aan kujirin Agabka aan dib-loo iibikarin ay soo iibiyaan hey'adaha daowladda
5. Heshiiskan Gaarka ah laguma dabaqayo shuruucdan:
   a) Xuquuqaha safaradda hawaha aan ka'ahayn xuquuqaha la'isasiiyay
   b) Adeegyada xiriirka laleh adeegsiga xuquuqaha safarrada hawada
6. Heshiiskan Gaarka ah waxaa lagu dabaqayaa shuruucdan:

a) Cillad bixinta iyo adeegyada Diyaaradaha
b) Iibka iyo suuq-geynta ee adeegyada Gaadiidka hawada iyo
c) Adeegyada Qalabka Kumbiyuutaradda

## Qaybta III

## Ujeedooyinka

## Qodobka 3aad

## Ujeedooyinka

1. Ujeedooyinka ugu muhiimsan ee heshiiskan gaarka waxa uu kala midyahay ujeedada Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee lagu caddeeyay Qodobka 3aad ee heshiiskan gaar ahaan in la'abuuro hal suuq Ganacsiga Adeegga oo xor.
2. Heshiiskan Gaarka ah waxa uu leeyahay ujeedooyin gaar u ah:
   a) Sare u qaadidda tartanka Ganacsiga Adeegga iyadoo loomarayo: horumarin Dhaqaale,hoos loodhigo qiimaha Ganacsiga, sare u qaadidda awoodda dhaqaalle ee Qaaradda iyo horumarinta kaabayaasha Dhaqaale
   b) Dhiirigelinta horumarka hiigsiga ee Qaaradda Afrika
   c) Kobcinta Dhaqaalaha Gudaha iyo Maalgashi dibadeed
   d) Sare u qaadidda dadaallda horumarinta warshadah Afrika si;loo horumariyo Dhaqaalaha Qaaradda
   e) In sida ugu dhaqsiyaha badan loo abuuro suuq Ganacsiga Adeegga ee Qaaradda Afrika oo aas-aaskiisu yahay caddaalad, is-dhaafsi Dano iyadoo labaabi'inayo caqabadaha ku hor gudbaan Ganacsiga Adeegga
   f) In lahubiyo lana dhameestiro suuqa xorta ah ee Adeegga iyo in lasameeyo lifaaqyo kala duwan ee gaar u ah Ganacsiga Adeegga
   g) In ladaboqo xoriiyaddda suuqa xorta ee Adeegga si'waafaqsan Qodobka 5aad ee heshiiska guud ee Ganacsiga Adeeggasi'loo kordhiyo xadka xirriyadda ujeedadiisu tahay horumarinta Adeegga dhoofinta.
   h) Sare u qaadidda is-kaashiga iyo wada shaqeynta ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan u jeedadu tahay dhaqaale abuur iyo dhiirigelinta tartanka suuqa Adeegyada iyo

i) Sare u qaadidda cilmi baarista iyo tiknoolajiyada ee laxariirta Adeegga si'loo abuuro Dhaqaale iyo Bulsho horumarsan

## Qaybta IV

## Waajibaad Guud iyo Anshax Marin

## Qodobka 4aad

## Dowladaha ugu habboon ee leh mudnaanta

1. Ayadoo la'ilaalinaayo Qodob kasta oo kamid ah heshiiskan Gaarka ah Dowlad kasta oo qayb ka'ah waa in ay ilaalisaa waana in ay isasiiyaan Adeegyo aan shuruud laheeyn oo aan kayareeyn tan lagula macaamilo Dowladda aan xubin ka;ahaayn heshiiska
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay xubin kanoqo karaan heshiisyo kale si'waafaqsan Qodobka 5aad ee heshiiska guud ee Ganacsiga adeegga waana in heshiiska cusub aanu kahor imaaneyn heshiiskan waxaane qasaba ah in lagaarsiiyo Dhammaan Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan
3. Iyadoo ay taagayihiin faqradda 1aad iyo faqradda 2aad laba Dowlad ama kabadan ayaa heshiis kugeli karaan in ay xor kadhigaan Ganacsiga Adeegga si'waafaqsan heshiiskan Gaarka ahl. Dowladaha kale ee xubnaha ahne waa ina ay aqbalaan
4. Inkastoo ay jirayaan faqradda 2aad ee Qodobkan hadane waa in Dowladda xubinta aaney gelin heshiis ay ka doorbideyso Kan marka uu dhaqangalo. Dowladda xubinta ah waxa loofasaxay wax isdhaafsi
5. Qodobada heshiiskan Gaarka ah looma fasirikaro in uu hor-istaagay wada tashiag  Dowlad kasta ee xubin ah si'waafaqsan heshiiskan ujeedkuna yahay fududeenta Ganacsiaga iyo waxsoosaarka Gudaha am agabka laga keeno dibadda
6. Dowladda xubinta ah waa ay hirgelikartaa sharci si'waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan liiska Dowladaha Mudnaanta Macaamil leh waa in ay dib lahu sameeyaa dib-u eegis joogta ah

## Qodobka 5aad

## Hufnaanta

1. Dowladda xubinta aha waa in ay baahisaa fursadaha maalgashi si’daahfuran ayadoo ku qoreeysa mid kamid ah luuqadaha midowga Afrika marka laga reebo waxyaabaha ku dhasha xaalad dedeg ah. Dowladda xubinta ah waa in ay baahisaa shuruucda iyo heshiisyada kale oo ay qeyb katahay Daladdu
2. Dowlad kasta ee xubin ka noqoneysa heshiiskan waa in ay ogeeysiis u keentaa xog-heynta inta aaaney xubin kanoqon ama aanu dhqangelin heshiis heer Goboleed ah ama heer caalami ah oo lid ku ah heshiiskan
3. Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan waa in ay keentaa warbixin sanadeed xog-haynta taa oo kussan isbedel kastaa ee kuyimid shuruucdeeda gudaha sida xeeraka, dekerootooyinka ama go’aannada maamul ee lid ku ah heshiiskan
4. Warbixinnad iyo ogeeysiisyada soogaara xafiiska xog-haynta waa in lagaarsiiyaa dhammaan Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan
5. Dowlad kasta ee xubin ah waa in kabixisaa jawaab codsiga, warbinnada iyo su’aalaha ka yimid Dowladda kale ee xubinta ama saameynta guud ee shuruucda heerka Gobol ama heer caalami ah ee lagu caddeeyay farqada 1aad ee Qodobkan
6. Dowladda xubinta ah ee ka jawaab celineysa codsiga, su’aalaha ama warbixinnada sare ku xusan waa in ay caddeysaa ayadoo magcaabeeysa waxa ay ka jawaabeyso si’gaar ahaaneed

## Qodobka 6aad

## Soo bandhigid Xog leh kalsooni

Dowladadaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay soobandhigaan xogaha iyo lidiga ku ah heshiiskan ee aan ka'ahayn xogaha lidka ku ah Dahana Qaranka gaar ahaan hey'adaha Ganacsiga Gaarka ah ama Dowladeed

## Qodobka 7aad

## Mudnaanta Gaarka ah

Si loo hubiyo in kororka iyo ka-faa'iideysiga ganacsiga ee adeegyada lagu helo

Dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in:

a) Dowladda xubinta ah tixgelin gaar ah siisaa isbadbadalka horumarineed ee adeegyada iyo qaababka ee sare loogu qaadi karo.
b) Dowladda xubinta ah ay tixgelisaa caqabadaha hor imaan kara bixinta adeegga waxayna bixin karaan dabacsanaan iyada oo loo marayo qaabeynta qorshayaasha dhaqaale aas-aaska si loo waafajiyo duruufaha dhaqaale ee gaarka ah iyo
c) Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay heshiisyo farsamo iyo kaabeyaal Dhaqaale kageli karaan fulinta heshiiskan

## Qodobka 8aad

## Xuqa xeer soo saarid

Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay xaq u leedahay in ay soo-saarto xeerar cusub oo ku saabsan adeegyada iyo Adeeg-bixiyeyaasha adeegyada gudaha Waana in la hubiyaa in xeerarka aaney kahor imaan heshiiskan gaarka ah

## Qodobka 9aad

## Xeerarka Gudaha

1. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in ay ka fulinayaan ballanqaadyo gaar ah, waana in ay hubisaa dhammaan shuruucdeeda gudaha in ay waafaqsanyihiin heshiiskan iyadoo loo marayo si' macquul ah ujeedo iyo hab hufan leh
2. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay dhisi karaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah garsoorka, Dhexdhexaadiyaal, ama maxkamadaha si' ay u maareeyaan muranada ka dhasha Ganacsiga

Adeegyada haddii nidaamyada noocan ahi aysan u madax banaaneyn Hey’adaha lagu aaminay go'aanka maamulka ee ay quseyso Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan ayaa hubin doona in laraacay habraacyada xeereed iyo dib-u-eegataba

3. Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan waxa ay bixikartaa dalabka iyo ogolaashaha adeeg fulin cidda awoodda u leh iyada oo aan dib udhac jirin si’waafaqsan heshiiskan

## Qodobka 10aad

## Isdhaafsi Aqoonsi

1. Gebi ahaan ama qeyb ahaan fulinta u jeedooyinka iyo shuruudaha lagu bixiyo shatiga hey’adaha bixiya adeegga si’waafaqsan faqradda 3aad ee Qodobkaan Aqoonsiga noocaas ah, oo lagu gaari karo is waafajin shuruucda lagu bixiyo shatiyada ama haddii kale, waxaa lagu salayn karaa heshiis dhexmara Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan
2. Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan si’waafaqsan farqadda 1aad ee Qodobkan waxa ay wada xaajood ka gelikaraan is-aqoonsi si’toos iyo iskaashi waxbarashadda, khibradaha, shatiyada, ama shahaadooyinka iyo in Dowladaha xubnaha ay is aqoonsadaan dhul ahaan
3. Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan kuma geli karaan heshiis Aqoosi siin Dowlad xubin ka’ah qaab caddaalad darro ah iyo adeegsiga shuruudaha oggolaanshaha, shati-siinta ama xayiraad ku soo rogtay ganacsiga gudaha adeegyada
4. Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan waa in:

a) Muddo (12) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda heshiiskan dhaqan gal kunoqday Dowladda ku wargaliso xoghaynta tallaabooyinka aqoonsi oo ay bixisay Dowladda si’waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan

b) in xogheynta ay si dhaqso leh ugu wargelisaa Dhammaan Dowladah xubnaha ka’ah heshiiskan iyo xilliga ugu macquulsan ee furitaanka wadahadalada si’waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan iyo in fursad lasiiyo fursad ku filan Dowlad kasta oo kale ee xubin ah si’ay ugu qeyp noqoto wada xaajoodka kahor inata uune gelin wejiga ugu muhiimsan

c) Xoghaynta waa in ay sida ugu dhaqsiyaha badan u wargalisaa dhammaan Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan aqoonsiyada cusub oo aas-aaskiisu yahay heshiis wax weyn kabeddelaya si'waafaqsan faqrada 1aad ee Qodobkan

5. Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan ee sameeynaya aqoonsi waa in ay ku saleeyaan Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika iyo shuruudaha kale ee Dowladda xubinta ah ama waxa ay lakaasha karaan Hey'adah Dowladda ama kuwa aan dowliga ahayn Qeybaha aygoo u sameunaya shuruudo iyo halbeeg xirfadlayaasha Ganacsi

## Qodobka 11aad

## Adeeg bixiyayaal loo gaar yeelaya adeegyo gaar ah

1. Dowlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waa in ay hubisaa in dhulkeeda aanu kajirin shirkad bixisa adeeg loo kaliyeed ah oo aan lala tartamikarin Waana in lahelaa hab lala jaanqaadi karo waajibaadka iyo ballan qaadyada gaarka ah si waafaqsan Barotokoolkan
2. Shirkadaha bixiya Adeegga waa in ay u tartamaan si toos ah ama si'dadban bixinta adeegyada, Dowladdu waa in ay hubisaa in aan lagu xadgudbin u jeedada iyo ku xadgudubka barotokoolkan
3. Dowlad xubin ka'ah heshiiskan ee aragta sabab lagu rumeysan karo inuu Adeeg bixiye kali ku ah adeegga Dowlad kale waxa lagu dhaqayaa si waafaqsan faqrada 1aad iyo 2aad ee Qodobkan, wuxuu dalban karaa Dowladda xubinta ah haynta ama u oggolaanshaha Adeeg biye noocan oo kale ah inuu bixiyo sababo gaar ah macluumaadka ku saabsan hawlgallada la xiriira
4. Marka uu dhaqangalo Baratokoolkan Dowladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in ay ilaaliyaan xuquuqda hal-abuurka iyo qodobbada la xiriira waana in la ogeeysiiyaa xoghaynta saddex (3) bilood ka hor qorshihii loogu talagalay wax ka beddelka ballan qaadyo gaar ah ayaa la isticmaalayaa
5. Sidoo kale Qodobadan waxaa lagu dhaqayaa xaaladda adeeg-bixiyeyaasha Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee si rasmi ah u saameynayaa:

    a) Awood loo siiyay adeeg-bixiyeyaal yar yar iyo
    b) Is-hortaaga tartamada badan ee adeeg bixiyayaasha

## Qodobka 12aad

## Ganacsi aan loo tartamin

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxay aqoonsan yihiin dhaqamada ganacsi qaarkood ee adeeg bixiyaal kuyimaadda qaab tartan furan oo aan ka aheyn ganacsiga gudah adeegyada lama huraanka u ah in laxadido
2. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan ay codsato in laga gacan siiyo Adeegga macluumaad bixinta Dowlad xubin ka'ah heshiiskan waa in laga gacansiiyaa si'waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkaan. Dowlad kasta rr xubin ka'ah heshiiskan waxa ay dalba kartaa in gacan laga siiyo sharciga gudaha iyo dhowrista xog warrankeeda

## Qodobka 13aad

## Lacag bixinta

1. Marka laga reebo xaaladah ku xusan qodobka 14aad ee heshiiskan Gaarka ah Dowladda xubinta ah looma adeegsan doono xayiraad ku saabsan wareejinta caalamiga iyo bixinta lacaga ee la xiriira ballanqaadyadeeda gaarka ah
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxaa qabanaya Qodobada laxariira lacag bixin iyo sarif ee Hey'adda lacagta Adduunka si'waafaqsan Qodobada heshiiskan, wax is-hortaag ah laguma sameykaro Dowlad xubin ah si'aan waafaqsaneyn heshiiska marka laga reebo sida lagu sheegay Qodobka 14aad ee heshiiskan.

## Qodobka 14aad

## Xannibaad Dhaqaale si loo helo Bedqab

1. Dowladda kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxaa lasaarayaa xayiraado ganacsi ama dhaqaale iyo cadaadis marka ay kagaabiso ama bixi weydo lacagyta Haddii ay dhacdo isku dheelitirnaan culus oo xagga bixinta lacagaha.
2. Xayiraadda dhaqaale ee lagu sheegay faqrada 1aad ee Qodobkan waa in:
   a) In lagu sameeyaa si'caddaalad ah ee Dowladaha xubnaha ah

b) Waa in lawaafajiyaa Qodobada Hey’adda lacagta Adduunka
c) In laga fogaado saameynta xun ee dhaqaale oo soo wajikarta Dowlad kale ee xubin ka’ah heshiiskan
d) Kama badnaa karto duruufaha lagama maarmaanka u ah la tacaalidda lagu qeexay faqradda 1aad ee Qodobkan iyo
e) In xaaladda cadaadiska laga dhigaa kumeel gaar iyo mid laga guul gaaro si’waafaqsan faqrada 1aad ee Qodobkan

3. Dowladah xubnaha ka’ah heshiiskan ayaa leh go'aaminta xallinta dhibaatooyin xayiraadaha ayaga ayaa bixinaya adeegyada kuwaas oo aad ugu muhimsan barnaamijyada dhaqaalaha ama horumarka. Si kastaba ha noqotee, xannibaadaha noocan oo kale ah lama sii wadi karo ujeeddada ilaalinta qaybta adeegga gaarka ah
4. Xayiraad kasta oo lafuliyay si’waafaqsan faqrada 1aad ee Qodobkan, ama isbedel kasta ee yimaadda, waa in si dhakhso leh loogu wargaliyaa xog-heynta
5. Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan iyo gudiga ganacsiga ee adeegyada ayaa ka wada tashan doona fulinta Qodobkan
6. Gudiga Ganacsiga ee Adeegyada waa in uu dejiyaa habraac loogu talagalay la tashiyo ujeedku yahay in laxalliyo xayiraadda waqti ku habboon
7. Wada-tashiyada noocan ah waxay qiimeyn doonaan isku-dheelitirka lacag bixinta Dowladda xubinta ah ee lasaaray xayiraadda, iyadoo la tixgelinayo Qodobada soosocda:
   a) Nooca iyo tirada lacagta lagu leeyahay Dowladda xubinta ah iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee dheeriga ah
   b) Dhibaatada Dhaqaale ama ganaci ee lakulanta Dowladda xubinta ah
   c) Tallaabooyin kale oo sixitaan ah oo la heli karo
8. Wada-tashiyadu waxaa looga hadlayaa xannibaadda lasaaray Dowladda xubinta ah si’waafaqsan faqradda 2aad tirsiga (e) ee Qodobkan
9. Wadatashiga noocan ah, dhammaan natiijooyinka iyo xaqiiqooyinka kale ee la soo bandhigay oo ay bixisay Hey’adda Lacagta Adduunka ee la xiriira sarrifka lacagaha, isu-dheellitirka sarifkaba iyo waa la aqbali doonaa si’waafaqsan Hey’adda Lacagta Adduunka
10. Haddii ay Dowladda xubinta ka’ah heshiiskan ay tahay Dowlad aan xubin ka ahayn Hay'adda Lacagta Adduunka ee larabo in lagu daboqo Qodobadan

Golaha Wasiirada ayaa u samaeynaya habraac ama waxa laraacayaa habraac kale eek u habboon

## Qodobka 15aad

## Qodobbo Aan ladabaqi Karin

Waxaa jiri karta shuruuc aan la hirgelikarin sababtuna ay tahay dhaxdhaxaadin ama takoorid aan macquul ahaynu ee u dhaxeysa Dowladaha Dhinaca ka'ah heshiiskan xaaladaha kale ee aan la hirgelikarin Qodobadan waxaa kamid ah:

a) Marka heshiiskan uu kahor imaanayo anshaxa guud ama kala dambeynta guud
b) Marka uu heshiiskan khatar ku yahay Nafta dadka, Xoolaha, dhirta ama caafimaadka
c) Qodobada heshiiskan oo aan waa faqsaneen Shuruucda iyo xeerarka lama huraanka ah oo ay kamid yihiin:
   i. ka hortagga ficillada khiyaanooyinka iyo wax kaqabasho la'aanta ay ku yeelan karto heshiisyada adeegyada;
   ii. ilaalinta macluumaadka gaarka ah ee shaqsiyaadka iyo ilaalinta macluumaadka sirta ah ee diiwaanada shaqsiga iyoxisaabaadka;
   iii. Amniga
d) Qodobada heshiiska oo aan waafaqsaneyn mucaamilaadka Qaranka Ujeedkiisu yahay hubinta sinnaanta ama ururinta cashuuraha tooska ah iyo adeeg-bixiyeyaasha qeybaha kale duwan ee Dowladaha iyo
e) Qodobada heshiiskan aan lasoco Karin waajibaadka u gaarka ah ee ummada fsida canshuuraha oo laba laab kabadan ama ku xiran heshiis caalami ah ama Dowlad kale ee xubin ka'ah heshiiskan

## Qodobka 16aad

## Qodobbo aan lasoco Karin Amni ahaan

1. Lama hirgelinayo hwshiiskan Qodobada soosoco:
   a) In Dowladda xubinta ah ay bixiyo macluumaad ay u aragto inay lid ku tahay ammaankeed aasaasiga ah ama

b) In Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan looga hor-tago in ku kaco tallaabo kasta oo ay ku dhaqaaqdo waxay qaddarinaysaa inay lagama maarmaan u tahay ilaalinta danaha amnigeeda:

   i. In uu bixiyo adeegyada amni oo toos ah aan toos ahayn u jeeddadu talagalay bixintaqalabka ciidamada

   ii. In Agabka laxiriira Alaabada la kala diri karo iyo waxyaabaha la isku halleyn karo ama qalabka ay ka soo baxaan; iyo

   iii. In lagalay waqti dagaal ama xaalad kale oo degdeg ah caalami ah

c) In laga hor-tago in Dowlad kasta uu qaado wax talaabo ah iyadoo la raacayo Waajibaadka ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay ee ilaalinta nabadgelyada caalamka

2. Xoghaynta waa in lagu wargaliyaa inta ugu macquulsan tillaabooyinka lagu qaaday faqradaha 1aad tirsiyadeeda (b/c) ee Qodobkan

## Qodobka 17aad

## Kab Dhaqaale

1. Heshiiskan gaarka ah madiidayo kab dhaqaale Dowlad xubin ah si' looga hor tago in Dowladda adeegsato barnaamijyo horumarineed
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ayaa go'aan ka gaaraya habka loo adeegsanayo iyo dib u eegista dhammaan kaalmooyinka la xiriira ganacsiga adeegyada ay xubnaha ka'ah heshiiskan siiyaan Dadkooda
3. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan ee isu arakta in ay si xun u saamaysay kabida wuxuu codsan karaa wada tashi uu la yeesho Dowladda xubinta ah. Codsiga ah waa in lagu muujiyaa tixgelin

**Qaybta V**

**Hormarinta isdhaxgalka**

**Qodobka 18aad**

**Hormarinta isdhaxgalka**

1. Dowladaha xubnaha ka ah heshiiskan waxa ay yeelanayaan wadaxaajood oo si'loo meelmariyo suuq xor ah oo horumarsan oo ay weheliso horumarinta iskaashiga sharciyeynta si'waafaqsan u jeeddooyinka heshiiskii Abuja ee 1991 xoojinta is dhex galka Ganacsi ee Qaaradda Afrika
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay kawada xaajoodaan waajibaadka gaarka ah ee qaab dhismeedka dhammaan waaxaha horumarineed ee loo baahanyahay si'loo gaaro iskaashi heshiiska gorgortanka ee waaxaha sharci dejinta iskaashi. Dhmmaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ayaa ka heshiinaya waxa xigi Kara ka dib Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika ee ku saleysan barnaamijka shaqada ee guddiga Adeegyada Ganacsiga
3. Nidaamka xoreynta suuqa Afrika wuxuu diiradda saari doonaa ciribtirka horusocodka saamaynta xun ee tallaabooyinka ganacsiga adeegyada si'loo meelmariyo is-dhexgalka Qaaradda Afrikaanka
4. Liiska waaxaha leh Mudnaanta iyo Hababka Ganacsi ee Adeegyada waa in lagu lifaaqaa Heshiiskan
5. Barnaamijka Shaqada Ku Meelgaarka ee Ku-Meelgaarka ah oo uu soo diyaariye Dowladaha xubinta ka ah waxay hagi doonaan dhammeystirka Wajiga 1aad ee wada xaajoodka heshiiskan gaarka ah ka hor inta aan la dhaqan gelin Heshiis

## Qodobka 19aad

## Suuq furan

1. Suuqa xorta ah ee lagu tilmaamay Qodobka1aad tirsigiisa “p” ee heshiiskan shirkadaha Dowlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxa ay bixisaa adeegyo Dawlad xubinta ah waxa ay heshiis kagelikartaa Dowlad kastaa ee dhinac ka’ ah heshiiskan si’waafaqsan shuruudaha iyo xaddidaadaha lagu sheegay Jaaantuska 8aad
2. Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan waa in ay dhulkeeda ka dhaqangelisaa suuq Ganacsi oo xor ah haddii aan si kale lagu cayimin Jadwalka, waxaa lagu qeexaa sidan:
   a) In laxadido tirada adeeg-bixiyeyaasha ha’ ahaadeen qaab ahaan
   Tiro-koobyada, adeeg-bixiyeyaal gaar ah ama labaaro baahida Dhaqaale
   b) In la xadido tirada lacagta ee adeegga hantida ku jirta ama labaaro baahida dhaqaale ee jirta
   c) In laxadido tirada guud ee hawlwadeenada adeeg bixiyayaasha ha’ahaado Qof dabiici ah ama hey’ad leh shaqsiyad Qaanuuni ah oo heysta shatiga adeeg bixinta
   d) In laxadido tirada guud ee dadka dabiiciga ah ee bixiya adeegyada gaarka ah, iyadoo ay qasab tahay in labaaro baahida dhaqaale ee jirta
   e) In laxadido tillaabooyin xakamaynaya hay'ad sharci ama wadajirka kaas oo adeeg bixiye ku siin karo adeeg iyo
   f) In laxadido ka-qaybgalka maalgashiga shisheeye marka loo eego saamileyda agaanista ee kaqeyb noqoshada adeeg bixinta

## Qodobka 20aad

## Mudnaan isku mid ah

1. Dowlad kasta ee xubin ka ah heshiiskan waxa ay heshiis lageli karaan Dowlad kale si ay u hesho adeeg wanaagsan dhammaan qeybaha kala duwan ee adeegyada
2. Dowladda xubinta ah ayaa soo saarikarta shuruudo si’waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan hadba iyadoo la’eegayo adeegyada danaha Dowladda iyo sida ay u rtabto adeegga

3. Dowladda xubinta ka'ah heshiiskan waa in ay si'rasmi ah oo cadaalad ah u sameysaa shuruudaha tartanka ee adeegyada

## Qodobka 21aad

## Ballanqaadyada Dheeraadka

Dowladdaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxay ka wada xaajoon karaan ballanqaadyada iyadoo la tixraacayo tillaabooyinka Saameynta adeegyada ganacsiga ee aan ku xirneyn jadwalka si'waafaqsan Qodobada19 iyo 20 aad Ballanqaadyada noocan ah waa in lawaa fajiyaa Jadwalka Dowladda ee Ballanqaadyada Gaarka ah

## Qodobka 22aad

## Jaantuska Ballan qaadyada Gaarka ah

1. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in uu dejiyaa jadwal ku cad ballanqaadyo gaar ah si'waafaqsan Qodobada 19aad, 20aad iyo 21aad ee Baratokoolkan.
2. Jaantuska ballan qaadyo kasta ee la sameynayo waa lagu fuliyaa Jadwalka Ballanqaadka Gaarka ah waana in uu cayimaa:
   a) Xaddidaadaha iyo shuruudaha helitaanka suuq
   b) Shuruudaha iyo u qalmidda heer Qaran
   c) Hawlo la xiriira ballanqaadyo dheeri ah iyo
   d) Goorta uu noqdo munaasib ee la hirgeli karo balanqaadka, waxaa qiime yeelanaya taariikhda dhaqangalka

3. Lama tixgelinayo ballan qaad kasta ee aan waafaqsaneyn Qodobada 19aad iyo 20aad ee heshiiskan

4. Jadwalka Ballanqaadyada gaarka ah hababka Ganacsi ee adeegyada Waaxaha mudnaanta leh adeegyada la'ansixiyay

5. Barnaamijka Shaqada ku meelgaarka ah oo uu soo diyaariyeen Dowladaha xubnaha ka' ah waa in lagu hagaa dhammeystirka wada xaajoodka Wajiga 1aad, ka hor inta aan la dhaqan gelin Heshiis

## Qodobka 23aad

## Wax ka badalida Jaantuska Balanqaadyada Gaarka ah

1. Dowladda xubinta ka'ah heshiiskan waxba kama bedeli karto ama ka laaban karto ballanqaad kasta oo waqtigiisa dhaafay 3 sano kadib marka uu dhaqangalay
2. Wax kabedelka ama kalaabashada ballan qaadka ee Dowladda xubinta ka'ah heshiiskan waa uu dhaqangelayaa marka ay Dowladdu wargeliso xogheynta muddo aan ka badaneyn 3 bilood
3. Codsi kasta ee Dowladda xubin ka'ah heshiiskan ee soo jeediso ka noqoshada si'waa faqsan 2aad ee Qodobkan, waxaa lagelayaa dulucda isbedelka ama waa laga wada xaajoonayaa magdhowga lama huraanka ah
4. Magdhawyada lagooyay waa in lagu sameeyaa sida ay isku raacaan Dowladaha ugu badan
5. Haddii aan heshiis laga gaarin isbadelka Dowladda xubinta ah waa in lala gala wada hadal u noqo karta magdhow iyo in ay qayb kanoqoto geedi socodka
6. Hadeysan jirin Dowlad xubin ka'ah oo codsaday xalinta khilaafka, Dowladdaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay xor u yihaiin hirgelinta soo jeedinta
7. Wax kabedelka ballan qaadka ee Dowlad xubunta ah waxa uu ku guntamayaa marka ay Dowladda bixiso magdhawga la saaray
8. Haddii Dowladda xubinta ay hirgelinta wax kabedelka iyadoo aan laga gelin wada hadal ama xal lagaarin khilaafka waxaa laraacaa si'waafaqsan Qodobka 4aad ee heshiiskan
9. Wada hadallada iyo wada xaajoodyada waxaa fududeynaya Gudiga Ganacsiga ee Adeegyad

## Qodobka 24aad

## Diidmada Faa-iida

Dowladda xubinta ka ah heshiiskan waa diidi kartaa bixinta faa-iido Marka la eego ogaysiinta hore iyo la tashiga adeeg-bixiyeyaasha ee Dowlad kale adeeggaas oo ay bixisay shirkad aan laheyn shaqsiyad Qaanuuni ah ama Dowlad aan xubin ka ahayn heshiiskan ama adeegga ayaa ha adeeg aan xiriir ganacsi la' lahayn ee Dowlad kale oo xubin ka ah heshiiskan

## Qaybta VI

## Qodobada Dastuuriga ah

## Qodobka 25aad

## Tashiga iyo Xallinta khilaafaadka

Qodobada heshiiskan iyo hab-raaciisaba waxa lagu xallinayaa khilaafaadha iyadoo laga sameynayo wada tashi si'waafaqsan heshiiska

## Qodobka 26aad

## Maamulka hirgelinta

1. Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 11aad ee Heshiiska Waxa ay dhisayaan Guddiga Ganacsiga ee Adeegyada, kaasoo fulinaya howlaha loo xisaaray. Guddigu waxay dhisi karaan guddi hoosaad haddii ay lahaboonaato si'waafaqsan heshiiskan
2. Goddoomiyah Gudiga waxaa dooranaya Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan
3. Shaqada Gudiga waxa ay tahay diyaarinta warbixin sanadeedka ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan iyo fududeynta maamulka iyo fulinta ee heshiiskan

## Qodobka 27[aad]

## Iskaashi caawimaad farsamo iyo dhismo kaabayaasha Dhaqaale

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay aaminsanyih in muhiimadda ay leedahay iskaashi caawimaad farsamo iyo dhismo kaabayasha Dhaqaale si dhameystiro xorriyadda adeegyada iyo in lagaaro u jeedooyinkaheshiiskan
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ayaa isku raacaya meeshii ay suurtagal tahay in laga abuuro iskaashi dhaqaale si'sare loogu qaado horumar dhaqaale ee Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan iyadoo loo marayo hannaankan:
   a) Dhismaha kaabayaal dhaqaale iyo tababar adeeg bixin
   b) Sare u qaadista kartida adeeg-bixiyeyaasha inay soo ururiyaan macluumaad ku in aad saabsan xeerarka heer caalami, Qaarad,Gobal ama Qaran
   c) Taageerida,ururinta iyo maaraynta macluumaadka tirakoobka ganacsiga adeegyada
   d) Hagaajinta awoodda dhoofinta ee adeegga gaar ahaan ageegga yaryar ama dhexe iyadoo mudnaanta lasiinayo Haweenka iyo dhalinyarada bixiyayaasha ah
   e) Taageeridda wada xaajoodka iyo heshiisyada dano isdhaafsi
   f) Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ayaa fududeynaya fududeynta is dhexgalka iyo wada hadalka udhaxeeya adeega bixiyaasha ee ku saleysan wadaagida macluumaadka, isdhaafsiga khibradaha, fursadaha suuqa, waxa barashada iyo wadaagista waxqabadka ugu wanaagsan;
   g) Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay wax ka qabtaan tayada iyo heerarka baahiyaha ee adeegga si'waafaqsan heshiiskan
   h) Dhisidda iyo hirgelinta nidaam gaar u ah qaybaha adeegyada ee Qaaradda Afrika heer gobol iyo heer qaran si'loo hirgeliyo u jeedooyinka heshiiskan
3. Xoghaynta waxaa waa jib ku ah isku dubaridka howlaha adeegyada iyo bixinta kaalmada farsamo, iyadoo la kaashaneysa Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan

## Qodobka 28aad

## Lifaaqyada Heshiiska Gaarka ah

1. Dowladaha xubinta ka ah ayaa horumarin kara lifaaqyada ku saabsan hirgelinta Heshiiska Gaarka ah yo dhaqangelintiisa:

a) Jaantuska meelmarinta heshiiskan

b) Mudnaan siinta Dowlado gaar ah

c) Adeegyada Gaadiidka Cirka

d) Goobaha leh Mudnaanta iyo

e) Qaabka fulinta iyo heirgelinta heshiiskan

2. Heshiiskan gaarka ah waxa lagu ansixinayaa Shir-madaxeed , lifaaqyada ku lifaaqan waxay qeyb kayihiin heshiiska

3. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay horumarin ku sameykaraan hirgelinta heshiisyada gaarka ah iyo lifaaqyada

## Qodobka 29aad

## Wax kabedelka Baratokoolka ah

Heshiiskan Gaarka ah waxaa laga sameykaraa waxkabedel si'waafaqsan qodobbada Qodobka 29aad ee heshiiskan

**Baratokool kusaabsan xeerarka iyo habraacyada Xallinta khilaafaadka**

Annaga oo ah Madaxda Midowga Afrika

Waxaan ku heshiinay Qodobada soosocda:

## Qodobka 1[aad]

## Qeexitaanno

a) **"AB**" waxaa loola jeedaa Golaha Rafcaannada ee lagu dhisay Qodobka **20** ee heshiiskan gaarka ah

b) **"Dhinaca cabtaha"** waxaa loola jeedaa Dowlad xubin ah ee he'yadda u soo gudbisa cabasho si'waafaqsan heshiiskan

c) "**Wada ogol":** waxaa loola jeedaa in Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee kasoo qeybgalay kulanka xallinta khilaafaadka ay gaaraan go'aan wada ogol ah

d) "**Maalmaha":** macnaheedu waa maalmo shaqo oo ccadiga ah eaana in lagu xisaabiyaa sida kucad taariikhda miilaadiyada

e) "**Muran**"**:** waxaa loola jeedaa isfahamdarro u dhexeeya Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan kuna saabsan fasiraadda Qodobada ee laxiriirta xuquuqaha iyo waajibaadka kadhasha

f) "**DSB":** waxaa loola jeedaa He'yadda Xallinta Khilaafaadka oo lagu dhisay Qodobka **5**aad ee heshiiskan gaarka ah

g) "**Ganaax**"**:** waxaa loola jeedaa Ganaax ee lagu xalliyo khilaafaadka ee lagu dhisay Qodobka **9**aad ee heshiiskan gaarka ah

h) "**Dowladda xubinta ee Dacwadda wadata":** waxaa loola jeedaa Dowllada xuninta ee qabta dacwadda

i) "**Dowladda xubinta ee laxilsaaray**" waxaa loo lajeedaa Dowladda xubinta ah ee loo xilsaaro katala bixinta iyo xallinta muranka

j) "**Dowladda saddexaad":** waxaa loola jeedaa Dowlad xubin ah ee aan ahayn labada Dowlad ee u dhexeeyo muranka balse dankaleh

## Qodobka 2$^{aad}$

## Ujeedo

Heshiiskan gaarka ah waxa uu dhisayaa hab maamul xalliya khilaafaadka si'waafaqsan Qodobka 20 aad ee heshiiskan udeedkiisu tahay in lahubiyo xalka oo kudhisan hufnaan, laxisaabtan, caddaalad si'waafaqsan Qodobada heshiiskan

## Qodobka 3$^{aad}$

## Xuduuda Heshiiskan Gaarka ah

1. Xuduudda heshiiskan gaarka ah waxa uu quseeyaa xallinta khilaafaadka ee kadhasha xuquuqda iyo waajibaadka ee kadhex dhasha si'waafaqsan Qodobada heshiiskan
2. Xallinta khilaafaadka ee heshiiskan gaarka ah waxa loo raacayaa xeer nidaamiye iyo habraacyo si'waafaqsan heshiiskan.
3. Ujeedada ah xallinta khilaafaadka waxa ay tahay in xal lagaaro tabashada Dowlad xubunka heshiiskan marka ay keensato arji si'waafaqsan Qodobka **7**aad ee heshiiskan gaarka ah
4. Xallinta khilaafaadka ee dowladkasta ee xubin ka'ah heshiiskan waa in la raacdaa xeerka iyo habka uu jideeyay heshiiskan

## Qodobka 4$^{aad}$

## Qodobbo Guud

1. Habka xallinta khilaafaadka ee dhismaha heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika waa udub dhaxaadka ee amniga iyo hab abuuraya xaalad degenaasho dhaqaale. Hannaanka xallinta khilaafaadka waa in uu ilaaliaya xuquuqaha iyo waajibaadka dhinacyada si'waafaqsan heshiiskan ama waxaa laraacayaa hannaanka sharci dhaqameed, ama sharciga caalamiga ee guud
2. He'adda xallinta khilaafaaka waa in ay raacdaa habka xallinta khilaafaadka ee heshiiskan waana in ujeedku noqdaa xal waara
3. Xalka ay gaaraan Dowladaha uu kadhexeeyo khilaafka ee xallista qaab isweydaarsi dano waa in ay ogeeysiiyaan hey'adda xalinta khilaafaadka si'waafaqsan heshiiskan

4. Xalka laga soo saaro muran si rasmi ah iyadoo la raacayo wadatashiyada iyo qodobbada lagu xallinayo muranka si'waafaqsan heshiiska, waxa ay qeyb ka noqonayaan heshiiska
5. Dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa in ay raadiyaan xalkamkhilaaf kasta ee ka dhexdhasha Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan qaab dhax-dhaxaadin ah. Dowladaha uu khilaafka u dhexeeyo waa in dhexdhexaandinta u qaadato si'niyad sami ah
6. Xalka ay keenaan Dowladaha xubinta ka'ah heshiiskan waa in aaney kudarin xalka Ganaax, tallaabooyin keeni kara yareeyn xuquuq iyo waajibaad ee Dowladaha iskhilaafsan

## Qodobka 5[aad]

## Hey'adda Xallinta Khilaafaadka

1. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxaa lagu dhisay si'waafaqsan Qodobka 20aad ee heshiiskan u jeedkuna yahay meel marinta heshiiskan iyo hab-raacyadiisa.
2. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxay ka kooban tahay wakiillo ka socda Dhammaan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan.
3. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxa ay leedahay awoodaha soo-socda:
   a) Dhisidda Guddiyada Xaliinta Khilaafaadka iyo Rafcaan Qaadashada
   b) Gudiga waxa uu qabanayaa warbixinta ashtakada iyo Rafcaanka
   c) Lasocoshada fulinta xukunnada iyo dib-u-qaabeynta guddiyada iyo Rafcaan qaadayaasha iyo
   d) Oggolaashaha joojinta ama ka-dhimista Ganaax lasaary Dowlad iyo waajibaadka kale heshiiska.

4. Hey'adda Xallinta Kahilafaadka waxa ay yeelanaysaa gudoomiye u gaar ah oo ay soo dooranayaan Dowladaha xubnaha ka' ah heshiiskan waxayna dejin doontaa xeerar hawleed lagama maarmaan u tahay fulinta mas'uuliyadeeda

5. Hey'adda Xallinta Kahilafaadka waa in ay shaqadeeda u qabsataa si'waafaqsan heshiiskan

6. Go’aannada xeerarka iyo hab-raacyada ee Hey’adda Xallinta Kahilafaadka waa in ay ku saleesnaadaan wada ogol

## Qodobka 6aad

## Habraaca Xallinta Khilaafaadka

1. Haddii labo Dowladood ama kabadan ee xubin ka’ah heshiis uu u dhexeeyo khilaaf waa in wadatashi laga sameeyaa si loo gaaro xal
2. Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan aaney dhinacyada dhaxdhigin heshiis waxa ay Dowladaha iskhilaafsani u gudbinayaan Guddiga Xallinta khilaafaadka si’ay xal waara uga gaarto arrinta khilaafka
3. Hey’adda Xallinta Khilaafaadka waxa ay soo dejineysaa Xeer Nidaamiye si’lagu sooxulo Guddiyo oo ay ku jiraan arrimaha anshaxa u jeedkune yahay in la hubiyo dhexdhexaadnimo
4. Guddigu ayaa soosaaraya habraaca xallinta khilaafaadka si’waafaqsan heshiiskan waana in dhinacyada is-khilaafsani ay dhowraan habraac kasta iyo xeer nidaamiye kasta.
5. Hey’adda Xallinta Khilaafaadka ayaa ka gaari doonta go'aan kama dambayn ah si’waafaqsan heshiiskan waana waajib fulintiisa
6. Marka dhinacyada is khilaafsan ay u arkaan in ay ku wanaagsan tahay in ay ku guuleystaan gar-qaadida wejiga hore ee xallinta khilaafaadka; dhinacyada is khilaafsan waa ay ku sii socon karaan gar-qaadida si’waafaqsan Qodobka 27aad ee heshiiskan

## Qodobka 7aad

## Wadatashiyo

1. Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan oo u jeeddadoodu tahay dhiirrigelinta xallinta Khilaafaadka, waxay caddeeyaan go'aankooda ku aaddan xoojinta hannaanka wadatashiga ee ay galeen Dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan
2. Dowlad kastaa ee xubin ka’ah heshiiskan waa in ay tix gelisaa wada-tashiyada ku saabsan wixii metelaad ah ee uu sameeyo Dowlad kale ee xubin ah oo la xiriira tillaabooyinka saameynta ku leh hawlgalka heshiiska.
3. Codsiyada la-tashiga oo qoran hadane sababeysan waa in ladhigaa xafiiska Hey’adda Xallinta Khilaafaadka iyada oo lasoo marinayo Xoghaynta

4. Marka ay Dowlad xubin ka'ah heshiiskan ay codsato wadatashi si'waafaqsan heshiiskan, Dowladda codsiga loodiray waa in ay uga jawaabtaa 10 maalmood gudaheed laga billabayo taariikhda lahelay codsiga waana in labillaabaa wadatashi si'niyad sami ah muddo aan kabadneyn 30 maalmood lagabillaabayo taariikhda lahelay codsiga si'loo helo xal waara
5. Haddii Dowladda xubinta ah ee loodiray codsiga aaney kajawaabin muddada 10 ka maalin ama aan la billabin wada tashiga muddada 30 ka maalin ah ee lagu sheegay farqadda 4aad ee heshiiskan ama si'kale aaney u heshiin Dowladda bixisay codsiga waxa ay ugudbi kartaa codsigeeda Hey'adda Xallinta Kahilafaadka si'loogaaro xal
6. Inta lagu guda jiro wadatashiga iyo ka hor intaadan bilaabin fulinta natiijada si'waafaqsan heshiiskan, Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxay isku dayaan inay helaan xal lagu wada qanacsanyahay
7. Wadatashiga waa in uu ahaadaa:
   a) Qarsoodi
   b) Waa in la'ilaaliyaa xuquuqda Dowlad kasta ee dacwo qataa

8. Haddi Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ay xalli waayaan khilaafka tashiga muddo lixdan 60 maalmood gudahooda ah kadib taariikhda lakeenay codsiga wadatashiga, Dowladda wadata codsiga waxa ya u gudbin karaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waana in Hey'adda kuxallisaa muranka mudda aan kabadneyn 60 maalmood

9. Xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jiraan kiisaska alaabada hallaabi karta waxaa loo nidaaminayaa sida soosocota:

a) Waa in Dowladaha ay quseeyso ay billaabaan tashiga 10 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la helay codsiga

b) Haddii xal lagaari waayo muranka wada-tashiga muddo 20maalmood ah kadib taariikhda la helay codsiga, Dowladda wadata codsiga waxay u gudbin kartaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka si'ay xal uga gaarto khilaafka

d) Iyadoo la raacayo qodobbada Lifaaqa 5aad ee xallinta caqabadahadag, Lifaaqa 2: habka xallinta khilaafaadka iyo Iskaashiga Ciribtirka Caqabadaha oo Dowladda xubinta ah ku guuldaraystay in ay hirgeliso kadib markii si wada jir ah xal loogu wada heshiiyey. Dowladaha xubnaha ahi waxa ay u gudbinayaan Hey'adda Xallinta Khilaafaadka si'loo gaaro xal si'waafaqsan Qodobka 27aad ee heshiiskan

10. Haddii Dowlad xubinka heshiiskan oo aan kamid ahayn khilaafka balse dano Ganacsi laleh dhinac kamid ah dhinacyada waxa ay codsakartaa in ay kusoobiirto wadatashiga muddo 10 maalmood gudeheed ah laga billabayo maalinta codsiga tashi lagudbiyayay.
11. Goobta wada hadalka waxa ay dhinacyada wada hadlaya ku soobiiri karaan dhinac seddexaad haddi dan ay ugu arkaan. Haddii codsiga dhinaca seddexaad aan la aqbalin, waa in ay ogeysiisaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka.

## Qodobka 8aad

## Dhexdhexaadinta iyo Dib-uheshiisiinta

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa ay sameykaraan dhax-dhaxaadin iyo dib-uheshiisiin iskood ah ee Dowladaha dhinaca ka'ah ee is-khilaafsani waana in uu ahaadaa sir iyadoo la'ilaalinayo xuquuqda dhinacyada.
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee is-khilaafsani waxa ay Dowladaha kale xubinta ka'ah heshiiskan ka dalbakaraan Dhax-dhaxaadin waqti kasta. Haddii dhinac kamid ah dhinacyada waxa uu dalbakaraa in ladhiso Guddi
3. Marka ay billaabaan dhaxdhaxaadinta Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ama inta ay socota dhaxdhaxaadinta dhinacyada is-khilaafsani waxa ay codsakaraan in lasameeyo Guddi, haddii la'aqabalo codsiga dhinaca waa in lagu dhisaa muddo 60 maalmood gudaheed ah waa marka dhinacyada ay u arkaan in Dowladaha xubnahaa ka'ah heshiiskan aan xalli Karin murannadan
4. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee dhageysanaya dacwadaha si'waafaqsan Qodobkan waxa ay jooji karaan Dacwadda waqti kasta, marka

ay tixgeliyaan in geedi socodka dhexdhexaadinta ay ku guuldareysteen inay xalliyaan khilaafka

5. Waxaa la'dhisayaa Guddi Dhaxdhaxaadin marka ay Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan ee khilaafku u dhexeeyo ay isku raacaan habka loo marayo dhaxdhaxaadinta
6. Madaxa xoghaynta waxa uu ka codsakaraa Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan isagoo wargelinaya Hey'adda Xallinta Khilaafaadka in la-fududeeyo habsami u socodka howlaha dhexdhexaadinta.

## Qodobka 9$^{aad}$

## Dhismaha Guddi Dhaxdhaxaadin

1. Guddiga dhaxdhaxaadinta waxaa dhisaya He'y'adda xallinta khilaafaadka marka ay hesho qoraal codsi Dowlad xubin ka'ah heshiiskan oo caddeysay in aan xal laga gaarin latashiyo hore
2. Codsiga lagu sheegay farqada 1aad ee qodobkaani waa inuu tilmaamaa in latashiyo la qabtay, cadeeyo in uu jiro khilaaf loo baahanyahay in xal waara lagagaaro
3. Haddii ay dhacdo in codsaduhu codsado Dhismaha Guddi leh shuruudo gaar ah aan aheyn shuruudaha caadiga ah, qoraalka codsiga waa in uu raacaa soo jeedinta shuruudaha gaarka ah ee Dhismaha Guddiga
4. He'y'adda xallinta khilaafaadka waa in ay 15 maalmood laga billabo maalinta la codsadey ku ansixisaa codsiga dhismaha Guddiga
5. He'y'adda xallinta khilaafaadka waa in ay Guddiga ku dhistaa muddo 10 maalmood si'waafaqsan faqradda 4aad ee Qodobkaan

## Qodobka 10$^{aad}$

## Qaab dhismmeedka Guddiga Dhaxdhaxaadin

1. Markay uu dhaqan galo heshiiska Xog-heyntu waa in ay qabataa liiska dad u qalma awoodna u leh in ay dhaxdhaxaadiyaan si'waafaqsan heshiiskan
2. Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan waxa ay sanad walba u magacaabi karaan 2 shaqsi Xoghaynta si'loogu daro liiska dhaxdhaxaadiyaal khibrad u leh heshiiskan waxaa ogolaashaha bixi kara He'y'adda xallinta khilaafaadka

3. Shakhsiyaadka kamid noqonaya dhaxdhaxaadiyaasha waa in laga helaa shuruudahan:
   a) Waa in lahaadaa aqoon iyo waaya-aragnimo xagga sharciga ama ganacsiga caalamiga ama aqoonta xallinta khilaafaadka
   b) Loo sooxulay si'ku saleysan himilo wanaagsan iyo xaakimnino
   c) Waa in uu a haadaa dhexdhexaad ,madax-bannaan, oo aan cidna ka'amar qaadan
   d) Waa in uu u hogaansanaadaa sharciga anshaxa ee He'y'adda xallinta khilaafaadka ee uu meelmariyay Golaha Wasiirrada.
4. Gudiga Dhaxdhaxaadiyaasha waa in lagu dhisaa aqoon, khibrad, madax bannaani iyo dhexdhexaadnimo si'uu u xaqiijiyo kalsooni dhammaan dhinacyada is-khilaafsan si'waafaqsan heshiiskan
5. Xubnaha Gudiga Dhaxdhaxaadiyaasha kamamid noqo karaan muwaadiniin ka soojeedda 2 da Dowladood ee muranku kadhexeeyo Si loo hubiyo loona ilaaliyo dhexdhexaadnimada iyo madaxbanaanida ee Guddiga.
6. Xoghaynta ayaa magcaabeyso xubnaha Guddiga Dhaxdhaxaadinta si'waafaqsan heshiiskan , Dhinacyadana waa in ay aqbalaan haddii aaney jirin sabab macquul ah oo ay ku diidi karaan
7. Dowladaha iskhilaafasani ayaga ayaa magcaabanaya Guddi Dhaxdhaxaadiyaal ayagoo latashanaya Guddoomiyaha Hey'adda Xallinta Khilaafaadka haddii aan muddo 30 maalmood ah laga billaabo maalinta codsiga loogeeyay Hey'adda Xallinta Khilaafaadka lagu dhisin Guddi dhaxdhaxaadiyaal
8. Guddoomiyaha Hey'adda Xallinta Khilaafaadka wuxuu ogeysiinayaa tirade Guddiga 10 maalmood gudaheed Dowladaha iskhilaafsan taariikhdan ka dib Gudoomiyaha waxa uu leeyahay codsi
9. Haddii Dowlada xubnaha ka'ah heshiiskani ee iskhilaafsani yihiin 2 dowladood, Guddiga Xallinta khilaafaadka waa in uu kakoobnaadaa 3 xubnood. Haddii Dowladaha iskhilaafasani kabadanyihiin 2 Dowladood Guddiga Xallinta khilaafaadka waa in uu kakoobnaadaa 5 xubnood
10. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waa in ay adeegaan awoodooda Qaanuuniga ah mana ahan wakiillo dowlad ama wakiillo urur.

11. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha ma'aqbalayaan tilmaamo iyo fara gelin katimid Dowlad kasta ayaga ayaa go'aanka iskaleh

## Qodobka 11^aad

## Shuruudaha Tixraaca ee Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha

1. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxa ay lahaan doonaan shuruudaha soosocda haddii aaney Dowladaha iskhiulaafasai si'kale ku heshiin 20 maalmood gudahood ah ee dhismaha Guddiga waana in laraacaa:
   a) In la baaro xubnaha Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha si'waafaqsan heshiiskan, dhinacyadana ay aqbalaan
   b) Natiijada baarista ee Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxa caawineysaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka iyo Go'aanno caddaalad ah
2. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxa ay fasirayaan Qodobbada heshiiskan ee khilaafka kataaganyahay
3. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxaa loo ogolyahay in ay xalka ay raadinayaan ay u isticmaalaan Qodobbo ay iyagu u dejiyeen dhinacyada muranku u dhexeeyo. Haddii dhinacyada ay ku qanciwaayayaan waxaa uu isticmaalaayan sxkssmts kucad faqrada 1aad ee Qodobkaan

## Qodobka 12^aad

## Hawlaha Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha

1. Shaqada ugu weyni ee Gudigu waa in ay ka caawiso Hey'adda Xallinta Khilaafaadka sidii ay kuguda lahayd Waajibaadkeeda si'waafaqsan heshiiskan
2. Si'loo gaaro u jeedka xal waara ee Dowladaha iskhilaafsan Guddi ayaa sameyanya qiimeyn hordhac ah xaqiiqdana waafaqsan adeegsiga iyo la jaanqaadida Qodobbada heshiiskan si'ay u caawiso He'y'adda xallinta khilaafaadka
3. Guddiga Dhaxdhaxaadiyaasha waa in uu si joogta ah ula tashadaa Dowladaha iskhilaafsan si'loo gaaro xal waara

## Qodobka 13aad

## Darafka Seddexaad

1. Gudiga Dhexdhexaadiyaasha waa in ay tixgeliyaan Danaha dhinacyada oo dhan oo ay ka mid yihiin dhinac saddexaa
2. Gudiga Dhexdhexaadiyaasha waa in la'ogeeysiiyaa dhinac saddexaa sida ay danahiisa muhiimka u yihiin ayaa soo saaray in dhinacyada is khilaafsan ay isku raaceen waana in ay ku soogudbiyaan Qoraal ahaan fursad u helo darafka seddexaad
3. Gudiga Dhexdhexaadiyaasha waa in ay sdeegsadaan nuqullada caddeymaha ah ay keenaan dhinacyada si'runta bannanka u timaad
4. Haddii darafka seddexaad loo tixgeliyo in xeerka uu yahay mid aan ladabiqikarin si'waafaqsan heshiiskan iyo habraaciisa habraacy hoos yimaadda. Khilaafka noocan oo kale ahi waa in loo gudbiyaa Guddigii asalka ahaa si'kasta au ku suurtoobikarto
5. Darafka Seddexaad waxa ay lasoconayaan dooda u dhexeeysa 2da Dowladeed ee iskhilaafsan ee lagu furay kulanka 1aad ee Guddiga

## Qodobka 14aad

## Habraaca ashtakooyin badan

1. Haddii in kabadan "1" Dowlad ay keenaan codsiga astako kadhan ah hal Dowlad, waxaa loo magcaabayaa hal Guddi si'uu xal uga dhaliyo waana in uu ilaaliyaa dhammaan xuquuqaha dhinacya
2. Gudiga keliya ayaa loo dhisayaa soo bandhiga wixii ka soo baxa Hey'adda xallinta khilaafaadka si'halkkas ay uga muuqato xuquuqda dhinacyada muranku u dhexeey.

   Haddii cabashooyinku kabadanyihiin hal cabasbo lidna ay ku yihiin hal Dowlad waxaa loo dhisaa hal Guddi balse haddii cabashooyinku badan yihiin waxaa loo dhisayaa in kabadan hal Guddi mid walba oo ka mid ah Cabashadu muujinayo wax a ay xaq u leedahay inay goobjoog ahaato markii mid ka mid a dhinaca kale ee cabashada soo bandhigaya aragtidooda Gudiga

3. Haddii la sameeyo wax kabadan hal Guddi si loo baaro cabashooyinka la xiriira isla hal arrinta, mid kasta oo ka mid ah Guddiyada kala duwan iyo jadwalka howlaha gudiga ee khilaafaadkaas waa in lees waafajiyo

## Qodobka 15aad

## Habraaca Guddiga

1. Guddiga waa in bixiyaa habraaca ku filan si'loo helo hubiyo xallin wax ku ool ah oo dhinacyadu ku qanceen
2. Ka dib markii ay ka wada tashadaan dhinacyada iskhilaafsan garwadeenna ay kayihiin Guddiga Dhexdhexaadinta Toddobo 7 maalmood ka dib markii la sameeyay Guddiga waa in ayaa loo gudbiyaa Dhammaan Dowladah xubnaha ka'ah heshiiskan
3. Gudiga Dhaxdhaxaadiyaasha waa in ay soo saaraan go'aanmuddo 10 maalmood gudahood ee ah maalmo shaqo wuxuune waqtigu ku dhacayaa dhaceyso 7 maalin si'waafaqsan faqrada 2aad ee Qodobkan
4. Gudiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxa ay jiri karaan ugu badanaan 5 bilood bilaabo maalinta ladhisay illaa taariikhda la soo saaray go'aanka Kama dambeysta ah kiisaska mudada Alaabooyinka burburi Kara waa hal bil iyo badh (1½) kamana bada karto.
5. Haddii Dowladaha iskhilaafsani ay xal kagaari waayaan khilaadka u dhexeeyo Gudiga Dhaxdhaxaadiyaasha waxa uu u gudbinayaa warbixin qoran oo kakooban, natiijada xaqiiqda, talo bixin iyo qodobad kuhabboon ee heshiiska waana in loo diraa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
6. Haddii Dowladaha iskhilaafasni ay xalka islagartaan, Guddiga waa in warbixinta oo qoraal ah u diraa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
7. Mudada warbixinta Guddiga Dhaxdhaxaadinta kama bada karto 5 bilood, ama hal iyo badh (1½) bilood gudahooda markay tahay xaalad degdeg ah, Golaha ayaa isla markaaba ogeysiin doona shirkadda Hey'adda Xallinta Khilaafaadka qoraalka waa in lagu caddeeyaa sababaha go'aanka iyo duruufaha uu soomaray Guuddigu waxa uu soosaari karaa warbixinta 9 bilood gudahood laga bilaabo taariikhda la sameeyay.

8. Go’aanka Guddiga waa go’aanno sababeeysan kadib marka dhinacda dooddu u dhaxeeyso la dhageesto ayna soobandhigaan caddeymohooda ama la dhageesto khabiir waana in Guddigu uu gaaraa go’aanka Dhinacyada oo kamaqan Goobta si’waafaqsan heshiiskan
9. Guddiga waxa uu soo saarayaan hal warbixin oo ka tarjumaysa aragtidiisa
10. Si’waafaqsan Qodobada heshiiskan, Guddigu waa in uu raacaa Qawaaniinta xiriirka laleh si’waafaqsan Lifaaqa heshiskan warbixinnada Gudigu waxa soo saarayaa kaddib marku latashado dhinacyada iskhilaafsan
11. Haddii Guddiga ay kacadsadaan labada dhinac ee iskhilaafasani in dacwadda lahakiyo muuddo aan kabadnaa Karin 12 bilood Gebi ahaan Galka waa xirayaan marka ay siddasi kacodsato dhinaca dacwoodaha aha dibna loo macodsakaro isla dacwadi in lafuro haaddii aaney dhammaan mudada lagu heshiiyay hakinta dacwadda waa in aaney kadhalaneyn meel kadhac xuquuqeed ee mid kamid ah laabada dhinac ee muran ku u dhexeeyo

## Qodobka 16aad

## Xaqa helidda xogta

1. Guddiga wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado macluumaad iyo talo farsam meel kasta oo kuhabboon ka dib marka la wargeliyo dhinacyada dacwadda
2. Guddiga wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado macluumaad iyo talo farsamo Dowlad kasta ee xubin ka’ah heshiiskan oo aan kujirin dhinacyada iskhilaafsani
3. Haddii Guddiga uu macluumaad ama talo warsado Dowlad xubin ah waa in lasiiyaa macluumaadka iyadoo aan lala daahin
4. Guddiga waa in ay ilaaliyaan Macluumaadka qarsoodiga ah ee la siiyo mana shaaci karaan fasax la’aan cidda bixisay
5. Guddiga waxa uu adeegsa karaa koox khubaro cilmiyeed ama farsamo marka khilaafka dhinacyada uu leeyahay culees
6. Xeerarka iyo habraaca dhismaha kooxda khubarrada waxaa lagu qeexayaa lifaaqa dulucda Dib u eegista
7. Guddigu wuxuu macluumaad ka raadi karaa meel kasta oo ay khuseyso si’aragtida khubarada uga midnoqoto gaaridda runta

## Qodobka 17aad

## Asturnaanta Xogaha Guddiga

1. Falanqaynta Guddiga ee go'aanka kahoreysa waa mid asturan

2. Gudiga waa in dhinacyada iskhilaafsani ay ula macaamileen si'asturnaan ah ama waxa ay u diri karaan Dowlad kale ee aan kamid ahayn dhinacyada

3. Dowladaha iskhilaafsan waxa ay soo bandhiga karaan caddeymaha iyo dooda ay kaqabaan dhinaca kale si'waafaqsan heshiiskan

4. Go'aanka Gudiga waxa uu gaarayaa marka ay soo dhamaato caddeymaha dhinacyada iyo dooda u dhexeysa wane in Go'aanku soo baxaa xilli ayaga oo maqan

5. Gudiga waa in aaney sheegin Fikradaha lagu muujiyey warbixinta iyo sida ay kala ahaayeen

## Qodobka 18aad

## Warbixinta Gudiga

1. Gudiga waa in uu tixgeliyaa doodaha ay dhinacyada soo jeediyaan waana in lagu xusaa go'aanka Gudiga
2. Dhinacyada muranku ka dhexeeyo waa in ay faallooyinkooda ku soo gudbiyaan warbixinta qabyada ah ee Guddiga
3. Faalooyinka Dhinacyada uu khukaafka u dhexeeyo ee lagu sheegay faqradda 2aad ee Qodobkan waxa ay leeyihiin Qiimo gaar ah waana in lagu sheegaa go'aanka ugu dambeeya ee Gudiga
4. Dhinacyada iskhilaafsani waxa waxa ay Gudiga ka codsa karaan in ay dib u eegis ku sameeyaan warbixinta ku meelgarka ah oo ay horey u soogudbiyeen kahor inta aan lasoo saarin go'aanka ugu dambeeya
5. Dhinackasta oo kamid ah dhinacyada muransan waxa ay xa u leedahay in ay codsato kulan dib u eegis warbixinta ku meelgaarka ah Gudiguna waa in uu qabtaa kulanka

6. Haddii dhinacyada aaney soo gudbin warbixinta xilliga loocayimay rasiidka faallooyinka ee Gudiga waxaa looqaadanayaa in uu yahay warbixintii ugu dambeysay waxaana loo gudbinayaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
7. Warbixinta ugu dambeysa ee Guddiga waa in ay kujirtaa doodihi lagu sameeyay marxaladda ku-meelgaarka ah

## Qodobka 1[9aad]

## Habraaca warbinta Guddiga

1. Si loo siiyo waqti ku filan Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waa tixgeliyaan warbixinnada Guddiga, waana in aan loodirin Hey'adda Xallinta Khilaafaadka kahor mudada dhamaashaah waqtiga oo ah 20 maalmood
2. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiishkan waxa ay diidi karaan go'aanka ka soobaxay Guddiga waana in diidmada oo Qoraal sababeysan ah loodiraa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka iydoo la'ilaalinayo habraacan:
   a) Diidmada go'aannadada waa in Hey'adda Xallinta Khilaafaadka lagu horgeeyaa 10 maalmood kahor kulanka looga hadlayo isla warbixinta Guddiga ee diidmada laga qabo
   b) Dowladda muujisay diidmada waa in ay nuqul kasiisaa Dhinaca kale muranka kala dhexeeyo iyo Gudiga
3. Dhinacyada iskhilaafsani waxa ay xaq u leeyihiin in ay kaqeybgalaan kulamada Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waana in ladhageestaa dooda ay sooqadimaan
4. Marka ay Gudiga shaaciyaan najiijada dooda u dhexeysay dhinacyada waxaa kafuran Rafcaan lagu qaadakaro 60 maalmood kudaheed laga billaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aanka uu saxiixay Hey'adda Xallinta Khilaafaadka. Rafcaanka waa in la'ogeysiiyaa Hey'adda waqtiga uu sheegay heshiiskan. Go'aanka Gudiga waa kama dambeys haddii aan laga qaadan rafcaan si'waafaqsan heshiiskan
5. Nuqulka Go'aanka Guddiga oo saxiixan ayaa lasiinyaa Dhinacyada muranka u dhexeeyay muddo 7 maalmood gudaheed ah laga billaabo maalinta lashaaciyay go'aanka
6. Dowladda Rafcaanka kaqaadatay go'aanka Guddiga waa in muudo aan kabadneyn 30 maalin loogu gudbiyaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka

## Qodobka 20$^{aad}$

## Golaha Rafcaanka

1. Golaha Rafcaanka waxaa dhisaya Hey'adda Xallinta Khilaafaadka. Golaha Rafcaanka waxa ay dhageeysanayaan Rafcaanka laga sooqaato Guddiga Dhexdhexaadiyaasha
2. Golaha Rafcaanka wuxuu ka kooban yahay 7 qof, Seddax 3 kamid ah waxay u adeegi doontaa kiis kasat.
3. Dadka u adeega Golaha Rafcaanka ayada ayaa kazoo saareysa habraaca
4. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka ayaa magcaabeyba xubnaha Golaha Rafcaanka oo yeelanaya muddo xileed 4 sano ah, dhammaadka muddo xileedka dib waa loo magcaabikaraa xubnaha, haddii xubin labedelo muddo xileedka waxaa dhameestiraya xubinta kale ee lagubedelay
5. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxa ay magcaabeysaa xubinta kabannaanaata muddo 2 bilood ah gudohood laga billaabo maalinta ay bannaanaato booska.
6. Haddii Hey'adda Xallinta Khilaafaadka ku guuldarreysato magcaabidda booska xubinta muddo 2 bilood ah, Guddoomiyaha Hey'adda Xallinta Khilaafaadka ayaa kala tashanaya xog-heynta waana in uu soomagcaabaa muddo aan kabadney hal bil gudaheed
7. Xubnaha Golaha Rafcaanka waxa uu ka kooban yahay shakhsiyaad leh khibrad xagga sharciga, ganacsiga caalamiga ah aqoonsan yahay, oo leh waxay soo bandhigeen khibrad sharciyeed, ganacsiga caalamiga ah iyo u jeedooyinka arrimaha heshiiska guud ahaan
8. Xubnaha Xubnaha Golaha Rafcaanka waa in aaney laxariirin dowlad waa inuu si buuxda u matalaa xubinimad Hesshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika Dhamaan xubnaheeda laheli waqti kasta iyagu kama qaybqaadan doonaan tixgelinta wixii khilaaf ah ee abuuri kara khilaaf toos ah ama mid aan toos ahayn oo dano laga leeyahay

## Qodobka 21aad

## Rafcaannada

1. Go'aannada Guddiga dhaxdhaxaadinta waxaa Rafcaan kaqaadaro dhinacyada iskhilaafsan. Darfka seddexaad waxa ay qaada karaan Rafcaan xaaladah ay jirto dan weyn waana in la'ogeeysiiyaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka si'waafaqsan faqrada 2aad ee Qodobka 13aad ee heshiiskan
2. Sida caadiga ah, dhageysiga dacwad kama badnaa karto lixdan 60 maalmood laga bilaabo taariikhda laqabtay codsiga go'aankiisa rafcaanka, si'waafaqsan faqradda 9aad (d) ee Qodobka 7-aad ee heshiiskan Haddii ay u aragto inaysan bixin Karin waa in lagu soo wargaliyo muddo lixdan 60 maalmood gudahood ah, waxay ku ogeysiin doontaa Hey'adda Xallinta Khilaafadka Qoraal sababeysan guud ahaan Dacwad qaadista madhaafi karto 90 maalmood
3. Rafcaanku wuxuu ku koobnaan doonaa arrimaha sharciga ee lagu soo sheegay go'aanka guddiga iyo tarjumaadaha sharciyeed ee ay diyaariyeen gudiga.
4. Golaha Rafcaanka waa in la siiyaa maamul ku habboon iyo sharci taageero hadba ayadoo lafiirinayo baahida jirta
5. Kharashaadka dadka ku shaqeeya Golaha Rafcaanka oo ay ku jiraan safarka iyo Kaalmada raashinka, waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Afrika iyadoo la raacayo xeerka maaliyadeed iyo qawaaniinta midoowga Afrika

## Qodobka 22aad

## Habraaca Rafcaan qaataha

1. Habraaca qaadashada Rafcaanka waxaa dejinaya Golaha Rafcaanka iyadoo lala tashanayo Guddoomiyaha Hey'adda Xallinta Khilaafaadka oo wuxuu lahadley Dowlad kasta ee xubin ka'ah heshiiskan
2. Habraaca Guddiga waa sir ah
3. Habraaca rafcaanka sida ku xusan qodobkaan kama badnaa karo sagaashan (90) maalmood

4. Go’aanada Golaha Rafcaannada waa in lagaaraa iyadoon la jaanqaadin Dhinacyada iskhilaafsani iyo macluumaadka laga dhageestay dhinacyada
5. Waa in aan lamuujin Dadka ka dhiibtay aragti lagu dhisay warbixinta Golaha Rafcaanka
6. Go’aanka Golaha Rafcaannada waa inay kahadasho arin kasta oo lagusoo qaaday si waafaqsan faqrada 3aad Qodobka 21aad ee heshiiskan inta lagu guda jiro racfaan sii wadid
7. Golaha Rafcaannada waxay taageeri kartaa, wax ka beddeli kartaa ama kala beddeli kartaa natiijooyinka sharciga iyo gunaanadka Golaha.
8. Golaha Rafcaannada waxay soo saari kartaa hal warbixin oo ka tarjumaysa aragtida aqlabiyadda xubnaheeda
9. Warbixinta Golaha Rafcaannada waa mid ay qaadan doonaan Hey’adda Xallinta Khilaafaadka iyo shuruud la'aan ay aqbaleen dhinacyadu in lagaarsiiyaa Hey’adda Xallinta Khiaafaadka isxintii AB muddo soddon (30) maalmood gudahooda kadib Ku wareejinta Dowladda xubinta ah heshiiskan

## Qodobka 23aad

## Guddiga iyo Hey’adda Rafcaanka

1. Haddii gudiga Dhaxdhaxaadinta ama ay ku soo gabagabeeyaan in hal xeer la waafajinay Heshiiskan, wuxuu ku talinayaa in Dowlad kasta la keeno in lagu cabbiro ku habboonaanta heshiiska. Waxa intaa u dheer iyadaalo bixinada, Gudiga ama Golaha waxay soo jeedin karaan habab ay Dowladda xubnaha ka’ah heshiiskan si’waafaqsan Qodobka 24aad ee Korjoogteynta Fulinta talooyinka iyo Go'aannad Dowladda xubinta ah waa in ay siidhakhso leh u hoggaansamaan awaamiirta iyo go'aannada Hey’adda Xallinta Khilaafaadka

## Qodobka 24aad

## Habka Ilaalinta fulinta shuruucda iyo talada Hey’adda Xallinta khilaafaadka

1. Dowladaha xubnaha ka ah heshiiskan waa in ay u hoggaansamaan go’aannada kasoo baxa Hey’adda Xallinta Khilaafaadka
2. Hey’adda Xallinta Khilaafaadka waa in ay wargelisaa Dowlaadda xubinta ah ay quseyso in ay ixtiraamto fuliso go’aannada ka soobaxa Hey’adda si’waafaqsan heshiiskan

3. Haddii Dowladda xubinta ah ay u aragto in aaney suurta gal ahayn in loo hoggaansamo lana fuliyo go’aanka kasoo baxay Hey’adda waa in lasiiyaa waqti ku filan si’waafaqsan habraaca soosocda:
    a) Dhinacyada iskhilaafsan waxaa lasiinayaa muddo go’an oo ay kusoo gudbikaraan soojeedinta cabashada lidka ku ah go’aanka Hey’adda Xallinta Khilaafaadka
    b) Mudada dhinacyada iskhilaafsan ay ku keeni karaan cabashada waa 45 maalmood gudahood laga billaabo taariikhda uu soobaxay go’aanka
    c) Maqnaashaha heshiis leesla’ ogolyahay go’aanka Hey’adda waxaa kafuran dhaxdhaxaadin mudadeedu tahay 90 maalmood laga billaabo maalinta go’aanka la shaaciyay. Go’aanka Hey’adda waxa uu dhaqangeli karaa 15 maalin kadib maalinta lashaaciyay Si kastaba ha noqotee, waqtiga wuxuu noqon karaa mid gaaban ama ka dheer, waxay kuxirantahay duruufaha gaarka ah
4. Haddii dhinacyada aaney ku heshiin dhaxdhaxaadinta muddo 10 maalmood waxaa loo gudbinayaa xog-heynta iyadoo lala tashanayo Hey’adda Xallinta Khilaafaadka waana in uu fulaa go’aanka 10 maalmood kaddib tashiga.
5. Xoghaynta waa in ay wargelisaa Hey’adda Xallinta Khilaafaadka ay ku sugan tahay hirgelinta go'aamada laga gaadho heshiiskan
6. Si’waafaqsan Faqrada 7aad ee Qodobka15aad ama Faqrada 2aad ee Qodobka 21aad ee heshiiskan mudada dhismaha Golaha Rafcaanka ee Hey’adda Xallinta Khilaafaadka kama badnaa karto 15 bilood haddi dhinacyada ku heshiin wax kaduwan mudadan. Halka Golaha Rafcaannada ama Guddiga dhaxdhaxaadinta ayaa kordhikara muddo15 bilood gudahood; waxaase shardi ah in haddii dhinacyada is khilaafsan ay isku waafaqaan in ay jiraan duruufo gaar ah kama badnaa karto 18 bilood
7. Si’loo dhaqangeliyo go'aannada, is afgaranwaaga ah waxaa lagu go'aaminayaa iyada oo loo tixraac nidaamyadan xallinta khilaafaadka, oo ay ku jiraan. Guddiga waxay warbixinta soo bandhigeysaa 90 maalmood ka dib taariikhda lasoo saaray warbixinta waqtiga xaddidan, waana in lawargeliyaa Hey’adda Xallinta Khilaafaadka qoraal ahaan sababaha dib u dhigista oo ay weheliso a Qiyaasta muddada ay ku gudbi doonto warbixinteeda

8. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waa in ay isha ku haysaa hirgelinta go'aannada. Dowladaha iskhilaafsan waa in ay shaaciyaan hirgelinta go'aannada ama Hey'adda ayaa ka soosaareysa war ku'aadan fulinta muddo 6 bilood kadib taariikhda lasoo saaray go'aanka si'waafaqsan faqradda 3aad ee Qodobkan, waana in uu ku jiraa ajandaha Hey'adda inta laga gaarayo xalka.
9. Dowladda xubinta ee qabta cabashada waa in ay gudbisaa 10 maalin ka hor kulanka Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waana in warbixinta cabashada ay kakoobnaataa:
   a) Heerka ay gaarsiisan tahay fulinta go'aanka iyo talo bixinno
   b) In warbixinta lagu caddeeyo haddi ay jiraan caqabado kahor imaanaya fulinta
   c) In warbixinta lagu caddeeyo mudada uu ku yaryahay dhinaca "Dowladda" una baahantahay muddo si'ay u hirgeliso go'aanka

**Qodobka 25aad**

**Magdhawga iyo waajibaadka kale ee Dhinacyada**

1. Dowladaha xubnaha ka'ah heshiiskan waxa waajib ku ah in ay hirgeliyaan go'aannada ka soobaxa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka iyo waa jibaadyada ka joogsiga ama waajib kale ee lasaaray Dowladda xubinta ah. Dowladda xubinta ah waa in ay caddeysaa sababaha maangalka ah ee keentay dib udhac kasta ee dowladdu dib uga dhigay fulinta go'aanka si'waafaqsan heshiiskan
2. Hakinta ama waajibaadka kale ee ku-meelgaarka ah waa ku meel gaar inta ay la jaan qaadayaan heshiiska, ama wixii kale ee la go'aamiyay jebinta ayaa la saarayaa, ama in Dowladda xubinta ah, ama ay sababtay u hogaansanaan la'aan, ama in wax la isla wadaago xal raali ah ayaa la gaadhay
3. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxa ay amri kartaa magdhaw haddii ay dhacdo in go'aannada ka soobaxay Hey'adda ay fuli weydo Dowlad xubin ka'ah heshiiskan mudada loogu asteeyay.

4. Dowladda Xubinta ah ee dhinaca ka'ah muranka waxa ay geli kartaa wada xaajood haddii ay kuguul darreysato fulinta go'aannda Hey'adda Xallinta Khilaafaadka ee muddada loo asteeyay si'waafaqsan faqradda 3aad Qodobka 24aad ee heshiiskan. Haddii ay aqbasho codsiga Dowladda xubinta ah ee dhinaca ka'ah heshiiskan waxaa lasiinayaa magdhaw. Haddii aan magdhow lagu qanci karo lagu heshiin muddo 20 maalmood gudahood ah Dowladda wadata cabashada waxay codsan kartaa oggolaansho kusocota Hey'adda Xallinta Khilaafaadka una joojiso arjiga loo diro Dowladda xubinta ah si'ay u tanaasusho ama waajibaadka kale ee hoos yimaada heshiiska
5. Magdhawga ama waajibaadka kale ee lasaarayo Dowladda xubinta ah waxaa lagu nidaaminayaa habraaca soo socda:
   a) Mabda'a guud ee ah in dhinaca wata cabashada ay tahay in marka hore la la hakiyo xadgudubka uu ka keenay cabashada
   b) Haddii xubuntaasi u arakto inaysan waxtar u lahayn joojiso tanaasul ama waajibaadka kale waxay isku dayi kartaa inay joojiso waajibaadka kale waaxaha kale ee hoos yimaada heshiiska
   c) Haddii xubuntaasi u arakto inaysan waxtar u lahayn joojiso tanaasul ama waajibaadka kale waxay isku dayi kartaa duruufaha jira mid khatar ah, wuxuu isku dayi karaa in la hakiyo ka-goynta ama wax kale waajibaadka ku xusan heshiiska
   d) Haddii dhinaca kale ee xubin ka'ah khilaafka uu go'aansado inuu codsado oggolaansho joojinta waajibaadka kale ee lagu sheegay tirsiyada (b) ama (c) ee faqradan 5aad waa in ay xubinta ku caddeeysaa sababaha codsiga ee Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
6. Marka lagu dabaqayo mabaadi'da kor ku xusan Dowladaha dhinaca ka'ah heshiiskan waa in tixgelin loosiiyaa sida soo socota:

   a) Ganacsiga qaybta ay hoos yimaadaan Gudiga ama Rafcaan qaadashada uu helay xad gudub ama nusqaan kale ama naafo ah oo ahmiyada ganacsiga u leh iyo

   b)Qaybaha waaweyn ee burburka dhaqaalaha iyo daciifnimada ee ka dhalata cawaaqibka dhaqaale

7. Heerka waajibaadka kale ay oggolaatay Hey'adda Xallinta Khilaafaadka waxay u dhigantaa heerka dhibaatada dhaqaale ee xubinta geeysatay

8. Si'waafaqsan faqradda 4aad ee Qodobkan, ay Hey'adda Xallinta Khilaafaadka, waxa ay bixineysaa rukhsad ka-dhaafid waajibaadka 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la soo codsaday marka lagareebo in Hey'addu ay go'aansatay inay ku raacdo goaamada diidmada. Haddii dhinaca uu codsado in la hakiyo waajibaadka kale ee ku xusan faqradda 5 (b) ama (c) ee Qodobkan waa in loo gudbiyaa dhaxdhaxaadiye ay soo magcaawdaan dhinacyada ama waxaa magacaabaya gudoomiyaha Hey'adda Xallinta Khilaafaadka muudo 60 maalin gudaheed laga billaabo taariikhda lamagcaabay dhaxdhaxaadiyaasha ka tanaasulidda ama waajibaadyada kale looma hakinayo mudada ay socoto dhaxdhaxaadinta.

9. Dhaxdhaxaadiyaha ku xusan faqradda 7aad ee Qodobkan, malaha awood kale oo ay wax ku xannikaraan laakiin waxay go'aan ka gaari karaan xal dhaxdhaxaadnimo si'waafaqsan heshiiskan iyo mabaadi'ida iyo habraacyadu qasabka ah in la raaco, dhinaca cabtaha waxa ay ku dabaqayaan si' waafaqsan faqradda 5aad ee Qodobkan. Dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo waa in ay aqbalaan go'aanka kama dambeysta ah ee dhaxdhaxaadiyaasha waana in go'aanka laga diiwaangeliyaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka lana siiyaa rukhsad lagu joojinayo waajibaadyo kale oo codsigu waafaqsanyahay go'aanka dhaxdhaxaadiyaha marka lagareebo codsiga aaney aqbalin Hey'adda

## Qodobka 26aad
## lacagta Qarashaadka

1. Hey'adda Xallinta Khilaafaadka ayaa go'aamineysa gunnada iyo Qarashaadka Garsoorayaasha, garqaadeyaasha iyo khabiirada si waafaqsan xeerarka maaliyadeed iyo qawaaniinta Midowga Afrika.
2. Qarashaadka safarrada iyo Hoyga ee gudiyada, garqaadeyaasha iyo khabiirada, waxaa ku qaadanaya dhinacyada muranka u dhexeeyo ama xeer ay go'aamisay Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
3. Dhinacyada khilaafka u dhexeeyo ayaa bixinaya dhammaan qarashaadka kale ee hawsha sida ay go'aamisay shirkadda Hey'adda Xallinta Khilaafaadka

4. Dhinacyada khilaafka u dhexeeyo waa in ay bixiyaan saamiga uga soo-aada qarashaadka kubaxa xoghaynta ama Golaha Rafcaanka

**Qodobka 27aad**

**Dhaxdhaxaadiyaal**

1. Dhinacyada is khilaafsan waxa ay qabsa karaan dhaxdhaxaadiyaal heshiis ay kuyihiin iyadoo la raacayo hab ay raali kawa yihiin
2. Dhinacyada is khilaafsan ee dacwadoodu galeen dhaxdhaxaadiyaal lama hor geykaro isla dacwadda Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
3. Heshiiska ay dhinacyadu kugaareen dhaxdhaxaadinta waa in lala socodsiiyaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka
4. Dhinaca seddexaad waa lagu biirin karaa dhaxdhaxaadinta dacwadda ku socota oo keliya heshiiska Qaybaha dacwadaha u kala gar qaadidda
5. Dhinacyada u kala gar qaadaya Dowladaha iskhilaafsan waxa ay abaalmarinno waana in lala socodsiiyaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka si' loo dhaqan galiyo.
6. Haddii ay dhacdo in Dowlad xubin ka'ah heshiiskan loo diido in ay iskaashi la yeelato Dowladkale ee xubin ah, Cabasho ayeey u gudbiklartaa Hey'adda Xallinta Khilaafaadka si' go'aan looga gaaro
7. Abaalmarinta dhaxdhaxaadiyaasha waxaa lagu dhaqangelinayaa si'waafaqsan Qodobada 24 iyo 25aad ee heshiiskan

**Qodobka 28aad**

**Iskaashiga farsamo**

1. Haddii dhinacyada iskhilaafsani ay ka codsadaan Dowlad xubin ka'ah heshiiskan ama Xogheynta waa lasii karaa talo sharci ee dheeraad ah iyo hannaanka xallinta khilaafka si'loo suurageliyo in dhinacyada ay gaaraan heshiis
2. Xoghayntu waxa ay abaabuli kartaa koorsooyin tababar gaar ah oo loogu talagalay dadka xiiseynaya hannaanka xallinta khilaafaadka si' loo suuro galiyo in Dowladda xubinta ah ay horumariyaan awooda khubarada ee xallinta Khilaafaadka

**Qodobka 29aad**

**Waajibaadka Xogheynta**

1. Xoghaynta waxa saaran mas'uuliyadda caawinta Guddiyada, gaar ahaan sharciga, taariikhda iyo dhinacyada habsami socodka.howlaha farsamo
2. Xoghaynta waa in ay fududayso xeerarka Gudiyada si’waafaqsan heshiiskan
3. Si’ loo fuliyo howlaha ku xusan Qodobka 28aad ee heshiiskan, Xoghayntu waa in ay ka faa'iideysataa dadka waaya-aragga u ah sharciga ganacsiga caalamiga ah si loo caawiyo Guddiyada
4. Xoghayntu waxa ay qabataa shaqooyinka kale iyo waajibaad kale ee suuragalka ah si’waafaqsan heshiiska iyo taageerida Hab-raaca
5. Xoghaynta waxa ay mas'uul ka tahay dhammaan ogeysiisyada dowladaha xubnaha ka’ah heshiiskan, Hey’adda Xallinta Khilaafaadka iyo Gudiyada

**Qodobka 30aad**

**Fasiraadda Shircigan**

Qodobada heshiiskan waxaa fasiraya Guddiga dhaxdhaxaadinta iyo Golaha Rafcaannada waana in ay ku fasiraan ayagoo raacaya xeer dhaqameedka ee sharciga guud ee caalamiga ah oo uu kamid yahay hesshiiska caalamiga ee sharciga Viena 1969

**Qodobka 31aad**

**Habraaca waxkabedelidda Heshiiskan**

Waxkabedelka heshiiskan waxa looga bedelikaraa si’waafaqsan Qodobka 29aad ee heshiiskan.

Heshiiskan waxaa marag ka’ah saxiixay oo shaabadeeyay annaga oo ah madaxda midowga Afrika iyo wakiillo matalaya Dowladaha xubnaha ka’ ah Ururka Midowga Afrika heshiiskan oo ah qoraal asal ah oo iskumid ah kuna qoran afafka Carabiga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Boortaqiiska.

Waxa lagu saxeexay Kigali, Rwanda maanta oo ah 21ka Maarso sanadka 2018